MAJALADDA MARAG

Cadadka Seddexaad | June 2025

# ISBEDDELKU HEBEL MA AHANE WAA HABDHAQANKA

C/raxman Caynte

Bogga: 25



Xigashada Sawirka: Villa Somalia

# Qorayaasha Majaladda



**Eng Abshir Siciid Axmed**

Puntland maxay maagan tahay: Mustaqbalka? 4



**Cali Xaaji Warsame**

AHMIYADDA HAY'ADAHA MAAMUL-WANAAGA & HUFNAANTA: XAALADDA SOOMAALIYA 7



**Xildh. Cabdullahi Faarax**

Curasho Bulsho: Qof ilaa Qaran 15




**Dr. Maxamed Cali Faarax**

Confederal-ku waa tallaabo hordhac ah oo Soomaali lagu kala goynayo 18



**Cabdiraxmaan Shiikhdoon**

DAREENKA MASUULIYADA IYO HUFNAANTA HOGAAMIYAHA: "Halbeegyadaga Hogaaminta Wanaagsan" 21




**C/raxman Caynte**

ISBEDDELKU HEBEL MA AHANE WAA HABDHAQANKA 25



**Cabdirashiid Maxamed Cabdi**

**Sheeko Qaran:** Halgankii Shiikh Xassan Barsane Nur 28



**Maxamed Nadiif Showkaani**

Masuuliyadda dadwaynaha (2). 30



**Mustafe Farah Osman**

Hirgelinta Xasillooni Waarta ee Deegaanada laga Sifeeyay Daacish 33

# Dhambaalka Tifaftiraha

Waxaa farxad iyo bogaadin noo ah in aan soo saarno daabacaadda Seddexaad ee Majalladda Marag, oo ah madal aan ugu talagalnay in lagu daabaco macluumaad kala duwan sida warbixino, falanqayno, iyo aragtiyo ay diyaariyeen dad kala duwan oo ka tirsan bulshada, sida cilmi-baarayaal, suxufiyiin, aqoonyahano, hal-abuurro, iyo dadka kale oo khibrad iyo aqoon u leh dhinacyada kala duwan ee nolosha.

Majalladda Marag, oo la qorsheeyay in la daabaco hal mar bishii, waxaa aasaasay xarumaha ku midaysan Iskaashiga Xarumaha Warbaahinta Soomaaliyeed (Somali Newsrooms Coalition – SNC). Iskaashigan wuxuu ka kooban yahay xarumo kala duwan, kuwaas oo kala ah: Milgo Media, Puntland Mirror, The Daily Somalia, Horufadhi Media, Dookh Press, iyo Gaashaan Dialogue.

Ujeeddada majalladdan waa in la helo madal ka duwan warbaahinta caadiga ah ee dalka ka jirta, kuwaas oo inta badan xoogga saara soo tebinta dhacdooyinka maalinlaha ah. Majalladdan waxay hiigsaneysaa inay bulshada u gudbiso macluumaad waxtar leh oo kor u qaada wacyiga iyo fahamka bulshada, kobciya doodaha iyo aragtiyaha caafimaadka qaba, soo bandhiga dhaliilo wax dhisaya oo daahfuran, islamarkaana dhiirrigeliya gaar ahaan dhalinyarada, si ay u noqdaan kuwo xog ogaal ah, si buuxda u fahma xaaladda dhabta ah, una gaari karaan go’aammo sax ah oo noloshooda iyo bulshada wax ku ool u ah.

Majaladdan waxay ka madax-bannaan tahay aragtiyaha siyaasadeed ee kala duwan ee dalka ka jira, waxayna u furan tahay qof walba oo doonaya in uu la wadaago bulshada fikrado, warbixino, iyo falanqeyn ku saleysan aqoon iyo waayo-aragnimo.

**Cabdi Cumar Bile**
Tifatiraha Guud



**Xigashada Sawirka**: Adobe Stock

# PUNTLAND MAXAY MAAGAN TAHAY:

## Mustaqbalka

**Eng. Abshir Siciid Axmed (Abshir Raabi).**

Sanadkii 1998-dii markii Puntland la asaasay, waxaa ujeedadu ahayd labo arrimood, tan kowaad waxay ahayd in deeganadu ay yeeshaan maamul iyo kala damayn, kana badbaadaan dagaaladdii ka socday koonfurta dalka, tan labaadna waxay ahayd,

In laga shaqeeyo in Soomaali la isugu keeno oo dib loo yagleelo qaranimadii burburtay 1991-dii.

Shirkii Embagaati, Kiinya ee 2004-tii waxaa lagu heshiiyey in dalka Soomaaliya uu qaato nidaamka federaaliga ah ee labo gobol iyo waxii ka badan xaq u siinaya in ay noqdaan dowlad goboleed ka tirsan Dowladda Federaalka Somaaliya. Aragtidaan waxaa lahaa siyaasiyiinta reer Puntland oo uu hormuud u ahaa madaxweynihii kowaad ee Puntland, ahaana madaxweynihii hore ee Soomaaliya Cabdullahi Yuusuf Axmed. Sababaha siyaasiyiintii markaas joogey Puntland nidaamka federaalka u doorteen oo Cabdullaahi Yuusuf ugu weynaa, hadana inta nool ugu weyn yahay Cabdiraxmaan Maxamed Faroole iyo Cabdi Faarax Juxa (wallow Juxa hadda ka weecday oo konfederaal u ololeeyo, waana mawduuca gaar ah) ayaa ahayd;

- In la garwaaqsaday ka dib burburkii dowladdii dhexe ee Soomaaliya in lagama maarmaan ay tahay in deegaanada awalkiisii hore gaari waaga la oran jirey ee inta badan la cidleeyey oo Muqdisho laga aadey aan markale la cidlayn.
- In qaxii iyo hanti beelkii lagala kulmay 1991-dii markale loo noqon.
- In dowlad Soomaaliya ka dhalata aysan ku koobnaan Muqdisho keliya.

Hadaan dib u milicsano taariikhda, maanta gobolada Puntland loo yaqaan, in badan dadkiisa hantida haystay, waxbaratay, iyo intii siyaasiyiinta ahaa waxay u guureen koonfurta. Waxaan ka dheregsanahay in gobolada dowladihii 1960-199-dii dalka xakumay aysan ka hirgelin adeeg dowladeed, mashaariic horumarineed, wershado iyo ilo dhaqaale marka laga reebo dekeda Boosaaso oo aakhirkii 80-aadkii la dhisay mudo kooban ka hor burburkii dowladii milatariga ahayd ee uu madaxweynaha ka ahaa Maxamed Siyaad Bare, iyado adeegkasta oo dowladeedna loo aadi jirey Muqdisho, waxaana la oran karaa inuu ahaa dhul iyo deegaan la hagraday (neglected region).

Ka dib in ka badan rubuc qarni ayaa kasoo wareegay asaaskii Puntland iyo curashada aragtida nidaamka federaaliga ah ee hormuudkii reer Puntland xiligaas u iba-fureen. Waxaase xaqiiq ah in aragtiyihu is bedeli karaan muddo dheer ka dib, siiba markay kacaan jiilal cusub, waxaa xaqiiq ah in fekerkii ay laahayeen foolaadka siyaasiyiinta reer Puntland weli jiro magac ahaan balse micne ahaan uusan jirin oo in badan oo ka mid ah jiilka hadda siyaasada ku jirta qiima weyn ugu fadhiyin aragtida federaalku. Taas waxaa dheer in badan dhalinyarada ka yar 35 jir ee ah tirada ugu badan ee mujtamaca aysan taariikhihii la soo maray ku bararugsanayn, waxaa intaas dheer jiilka siyaasiinta ah oo badankood aaminsanayn aragti qotodheer ee u joogaan maalin-tooxsi, iyo xil iyo xoolo ay helaan markaas, tan waxaa daliil u ah siyaasiyiinta reer Puntland markay xil ka hayaan Puntland aad ayey ugu ad-adagyihiin aragtida nidaamka federaalka ah balse markay dowladda federalka ah xil siyaasi ah ka qabtaan isla aragtidii ayey kasoo horjeedsadaan.

Waxaan shaki ku jirin waxa yar doodaha arrimaha federaalka ah oo khasbaysa in aragtidaani suuq weyso, ma jirto cid ka niqaashta faaiidada iyo khasaraheeda mudo dheer ka dib markii la qaatay fikarkaan. Dhankale, 20 sano ka hor, magalooyinka Puntland waxay ahaayeen meelaha ugu dadka badan dalka Soomaaliya sababto ah koonfurta oo dagaal ka socday awgeed, magaalada Boosaaso oo ahayd xarunta ganacsi ee dalka iyo marinka tahriibta dadka fursado shaqo iyo nololeed u raadsanaya dalalka Khaliijka Carabta. Su'aasha maanta taagan waxay tahay maxay Puntand maagantay, mustaqbalka dhow iyo kan fogba?.

Puntland ma leedahay pull factor (soo kasbasho) dhaqaale, ka dhiga gobol loo soo shaqo iyo ganacsi tago oo ka fursad fiican goboloda kale, hadaysan ahaynse malaga shaqayn karaa in ay noqoto mustaqbalka? maxaa nidaamka Puntland u diiday inuu ka fekero inuu hirgeliyo fursado

ganacsi oo kumanaal dhallinyaro ah shaqo abuur u noqda? dhalinyarada badan ee tahriibaysana xal u noqda. Waxaa dhici karta dadka badankood in ay is dhehaan lama samayn karo shaqo abuur iyo maalgashi ganacsi taageero shisheeyela'aanteed, taasina waa dood daciif ah. Cashuurta dowladda soo gasha ayey inyar uga qoondayn kartaa in ganacsatada la daymiyo in ay qalabka wershedaha ku soo gataan, mudo 5-10 sano ahna ku baxshaan, iyo in qalabka beeraha oo beeralayda la siiyo si ay fursad ugu helaan ay ku beertaan qutul yawmka, badeecadaha dalka kasoo baxana ee dibada laga keeno cashuurta loo siyaadsho si aysan u suuq tirin waxsoosaarka degaanka. Sido kale in shacabka loo fududeeyo la soo bixida macdanta, dowladduna cashuurta ka qaadato. Dhiirigelinta xoola dhaqashada iyo hirgelinta biyo xireeno looga faaiidaysto biyaha raxmada Eebbe ee roobka. Arrimahaan waa aragtiyo dhaqaale oo cilmiyeysan sida ay qabto aragtida dhaqaale ee Keynesian Economics ama Aggregate Demand oo qabto in dowladdu kharash-garayso canshuurta soo gasha si wareega lacagtu u kordho.

Xalka dhaqaale waa fududyahay balse Puntland waxay u baahan tahay aragti siyaasadeed oo degan, deegaankana ku kalsoon (think globally, act locally). Siyaasiga reer Puntland waxaa looga baahanyahay in uu dadka iyo degaanka ku kalsoonaado, ujeedkiisa koowaad ee xil federal ah noqon markuu fursad u helo in uu Puntland ku metelo dowladda federaalka ah ee ay jiraan arragtiyo iyo mabaadi aan laga tilaabsan karin. Siyaasada Soomaaliya ee is bedbedelaysa waa in siyaasiga reer Puntland arragti cayiman ka leeyahay, dooda iyo fikradaha aan laga tanaasuli karina shacabka ku qancin karaa. Haddii ay dhici weydo in siyaasiyiinta xilka haya ee Puntland aragti waadix ah oo la wada ogyahay, fagaare kastana laga sheegi karo yeelan waayaan waxaa dhici doonta in fikarka federaalku noqdo mid waqtigiisu dhamaado oo la god gala akhyaartii lahayd fikarkiisa, jiilka cusubna ay sii wadi waayaan.

Waxaa kale oo muhiim ah in Puntland maamul ahaan aysan marnaba fursad siin in xurguf siyaasadeed dhexmarto dowladda federalka ah. Waa daw in ay jirto kala aragti duwanaan iyo doodo taagan oo masiiri ah balse xurguf siyaasadeed wax faaiido ah ma soo kordhineyso. Taas bedelkeeda waxaa ka faaiido badan in Puntland hormuud u noqoto in Dowladda Federalka Soomaaliya hirgeliso dastuur leh dabar iyo xayndaab ibafur u noqda heshiis bulsho oo 100 sano iyo ka badan loo aayo. Scotland oo ka mid ah Boqortooyada Ingiriiska ayaa tusaale laga dhigan karaa oo iskeed isu maamusha marka la joogo qaybsiga waxsoosaarka dalka oo ay kow ka tahay shidaalka kasoo baxa gobolkeed, waxayna isticmaalaan heshiis la xadididay 1979-kii oo loo yaqaan Barnett formula.

Puntland waa in ay hormuud u noqotaa ka shaqaynta ha'yadaha adeega baxsha ee federaalka in lagu baahsho dalka, oo xarumahooda dhexe gobolada saldhig looga dhigo si aan Muqdisho loogu soo xoomin, fursadaha shaqo dadka degaamadooda loogu geeyo, tusaale Taliska Ciidanka Badda Soomaaliya laga dhigo Boosaaso ama Caluula. Wakaalada Socdaalka iyo Jinsiyadaha xarunteeda dhexe laga dhigo Beledweyne, wakaaladaha kale ee dalkana midba gobol iyo magaalo xarun looga dhigo. In aad gudaha joogto ayaa ka faaiido badan banaan jooga (in or out), waxaana tusaale ka dhigan karnaa dalka UK oo 2016-kii ka baxay Midowga Yurub balse isbedelka siyaasadeed iyo dhaqaale ee dunida ka jira ayaa hada ku khasbay in ay garwaaqsadaan in Midowga Yurub heshiis horleh oo wada shaqayn lala galo. Tan waxaan ula danleeyahay adigoon ka tanaasulin aragtidaada miiska wada hadalka ka soo jeedin kartaa, markii lagu maqli waayona shacabka u gardhiiban kartaa.

Ugu dambayn, xasarada waa in lagu bedelaa xal, aamuskana lagu bedelaa dood iyo fagaare ka hadal. Mustaqbalka ay higsaneyso Puntland bulshada lala wadaaga oo ay kow ka tahay koboc dhaqaale iyo xasilooni siyaasadeed oo is-garab socda.

**W/Q:** Eng. Abshir Siciid Axmed (Abshir Raabi).



**Xigashada Sawirka:** AI (Garaadka macmalka ah)

# AHMIYADDA HAY'ADAHA MAAMUL-WANAAGA & HUFNAANTA:

## XAALADDA SOOMAALIYA

Cali Xaaji Warsame

# HORDHAC:

Kadib burburkii dowladdii dhexe ee Soomaaliya sanadkii 1991, awoodda hay'adaha dowliga ah si weyn ayey u tabardareeyeen. Waxa ay taasi saameysay hay'adihii loo xilsaaray horumarinta maamul-wanaagga, hufnaanta, abuurista kalsoonida bulshada, la dagaallanka musuqmaasuqa, iyo ilaalinta kheyraadka dalka. Isla xisaabtan la'aanta baahsan ayaa kor u qaaday heerka musuqmaasuqa, waxayna keentay in si khaldan loo isticmaalo hantida dadweynaha, taas oo ragaadisay dadaalladii dib-u-soo kabashada. Arrimahan ayaa si toos ah u nuxuusiyey awoodda hay'adaha dowliga ah ee bixiya adeegyada aasaasiga ah ee shacabka ay aad ugu baahan yihiin. Waxaa sidoo kale sabab u ahaa xaaladdan dagaalkii sokeeye, kaas oo dhaliyay baahi loo qabo dhismaha maamullada heer deegaan iyo adeegyo bulsho oo muhiim ah.

Jidka Soomaaliya ee nabadda iyo horumarinta ayaa la horjoogsaday muddooyinkii dagaalka, waxaana soo korodhey xasilooni-darrada siyaasadeed iyo caqabado hortaagan nidaam wanaagsan oo hufan. Dalka waxaa soo maray waqti dheer oo dagaal sokeeye ka socdey, nidaam maamul oo aan shaqayn, iyo burburka hay'adaha dowliga ah. Sidaas awgeed, inta badan waxaa meesha ka baxay hay'adihii dowliga ah ee loo igmaday maamul-wanaaga iyo hufnaanta, sida Xafiiska Hantidhawrka Guud, Xisaabiyaha Guud, Guddiga La-dagaalanka Musuqmaasuqa, Hay'adda Qarankae ee Wax-Soo-libsiga, Ururadda Bulshada Rayidka ah iyo Warbaahinta Xorta.

Maanta, Soomaliya waxay ka mid tahay dowladaha ugu nugul adduunka ee loo yaqaan (world's most fragile states), iyadoo la tacaalaysa musuqmaasuq baahsan, qaraabo-kiil heersare ah, amni-xumo, maamul liita, iyo kalsoonida dadweynaha oo hooseysa. Isku daygii ugu horreeyay ee guuleysta ee lagu soo celinayo maamul dowlad Soomaliyeed wuxuu ahaa Shirka Carta ee sanadkii 2000, kaasoo ugu dambeyntii horseeday aasaaska Dowlad Qaran oo Ku-meelgaarka ah (TNG), oo ku saleysan qaabka awood-qaybsiga ee loo yaqaan 4.5. Si kastaba ha ahaatee, hindisahaan cusub ee dowlad-dhiska Soomaaliya waxaa dhaawacey shirciyad-la'aan, iyadoo aad looga horyimid dowladdii lagu soo dhisey Carta, maamul-xumo, hoggaamin la'aan iyo faragelin caalami ah.

Sidaas darteed, saameyntii TNG ma gaadhin meel ka baxsan magaaladda Muqdisho. Is-qabqabsi dhexdeeda ah darteed waxaa soo baxay jilayaal cusub oo ka faa'iideysanaya khilaafkaas siyaasadeed, iyagoo ka dhex arkey dantooda gaarka ah, dowladiina ka dhigtey gabbaad dano qoyseed lagu gaaro. Sanadkii 2004, waxaa la dhisey Dowladdii Federaalka Ku-meel-gaarka ahayd (TFG) oo bedelaysa TNG, iyadoo lagu yagleelay nidaam ku dhisan federaaleynta dalka iyo dib-u-habaynta hay'adaha muhiimka ah ee dowliga ah.

Dowladdii la dhisay xilligaas waxaa si weyn u saameeyey khilaaf cusub oo soo kala dhexgalay hay'adihii dowladdii federaalka aheyd iyo la dagaallanka maleeshiyaadka Al-Shabaab, oo si baahsan xakameyn buuxda ugu laheyd qaybta koonfureed ee dalka. Haddii aan hore u soo socono, qaadashada Dastuur Ku-meel-gaarka ah oo ku dhisan nidaamka federaalka ah ee 2012, ayaa calaamad u ahaa guul muhiim ah oo lagu doonayey in dib loo dhiso hay'ado dowladeed iyadoo la adeegsanayo nidaamka federaalka ah. Isla wakhtigaas, qaabkii ku dhisnaa awood-qaybsiga ee 4.5 ayaa si dhab ah loo ansixiyey.

In kasta oo horumarkaas la sameeyey, haddana waxaa jirey caqabado dhab ah oo ay ka mid tahay faragelin siyaasadeed, musuqmaasuq baahsan iyo khatarta joogtada ah oo ka imaaneysay kooxaha xagjirka ah sida Al-Shabaab, intaas oo dhammaan saameyn ku yeeshay horumarkii dalka. Intaa waxaa dheer, hoggaaminta iyo hay'adaha daahfurnaanta oo liitey, taas oo xannibaysa waxtarkooda. Hay'adaha hufnaanta iyo maamul-wanaagu waxay muhiim u yihiin dib-u-dhiska dalka. Hay'adahani waxay muhiim u yihiin soo-celinta xukun ku dhisan xeer iyo sharci, kaasoo dalka u horseeda horumar iyo dowladnimo. Hufnaanta hay'adaha maamulka waxay door muhiim ah ka ciyaaraan hubinta badqabka dalka iyo dadka, dareenka mas'uuliyadda qaranka iyo aaminaadda tallaabooyinka ay qaadeynso dowladdu.

Maqnaanshaha ama liidashada hay'adahaan aasaasiga ah ayaa si weyn u dhaawacay maamulka dalka iyo sida wax ku oolka ah ee ay u shaqeeyaan hay'adihiisa maamul, isla-xisaabtanka heerarka dowladda federaalka ah ee dhexe (DFS) iyo dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka ah (DXDF). Sidaas darteed ujeedada maqaalkan waa in la iftiimiyo saameynta hay'adaha hufnaanta iyo maamul-wanaaga ay ku

leeyihiin hannaanka dowladnimada dalka iyo mas'uuliyadda dowladda Soomaaliya.

Hay'adaha hufnaanta ee Soomaaliya waxay leeyihiin taariikh adag oo marar badan caqabadooyin leh, waxaana si weyn u saameeyey xukunkii milatariga ahaa ee dalka xukumayey muddadii 21 sano aheyd iyo muddada dheer ee dalku ku soo jirey colaado iyo xasilooni-la'aan siyaasadeed xilligii dowlad-burburka. Hay'adahani waxay ujeedadoodu tahay in la hagaajiyo mas'uuliyadda iyo hufnaanta maaraynta maaliyadda iyo maamulka, si loo ilaaliyo hantida dowladda.

Hase yeeshee, waxtarkooda waxaa si weyn caqabad ugu ah dhibaatooyinka kala duwan, ee dalka ku habsadey sida kheyraadka dalka oo xaddidan, faragelin siyaasadeed oo toos ah iyo walaacyada xaga amniga. Waxtarka iyo shaqada saxda ah ee hay'adaha daahfurnaanta iyo maamul wanaaga ee muhiimka u ah mas'uuliyadaha dowliga ah iyo maamulka—sida hay'adaha dowladda ee ka mas'uulka ah xeer-dejinta (ansixinta iyo fulinta xeerarka) ee loo yaqaaan baarlamaanka, Hantidhawrka Guud, Xisaabiyaha Guud, Hay'adaha Ka-hortagga Musuqmaasuqa, Hay'adda Wax-Soo-Iibsiga Qaranka, Ururada Bulshada Rayidka ah ee firfircoon, iyo warbaahinta mas'uulka ah waxay muhiim u yihiin awoodda daahfurnaanta hay'adaha dowladda, ilaalinta maamul-wanaaga iyo hantida qaran. Howlgalka hufan ee hay'adahaasi ayaa si toos ah u saameeyaa mas'uuliyadda dowladda iyo badqabka muwaadiniinteeda.

Muwaadiniintu waxay xaq u leeyihiin in ay helaan macluumaad ku saabsan hawlgallada maamulka dowladda, waxayna sidoo kale xaq u leeyihiin in ay ka qaybqaataan geeddi-socodka go'aan-qaadashada dowladda ee arrimaha masiiriga ah. Haddaba, qormadaan waxaan uga hadli doonaa kuwa ugu muhiimsan hay'adaha maamul-wanaaga iyo hufnaanta.

# 1. LAANTA XEER-DEJINTA (BARLAMAANTA):

Hay'adaha muhiimka ah waxaa ka mid ah baarlamaanka, oo ka dhigaya laanta fulinta mid lala xisaabtami karo iyada oo loo marayo baaritaanno dadban iyo su'aalo toos ah intaba. Saddexda laamood ee dowladnimada—Fulinta, Garsoorka iyo Xeer-dejinta—waa inay kala madax-bannaan yihiin, mid kastana wuxuu doorkiisa muhiimka ah ka ciyaaraa qaab hufan oo lagu ilaalinayo nidaam-maamul oo dheeli tiran oo waxtar leh. Laanta fulinta waxay mas'uul ka tahay hirgelinta iyo dhaqan-gelinta shuruucda iyo xeeraka dalka oo uu barlamaanku soo saaro. Laanta Garsoorku waxay turjuntaa oo hirgelisaa dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka, halka laanta xeer-dejintu samayso xeerarkaas.

Si loo hubiyo isu-dheelitirka laamahaas dowladda dhexdeeda, saddexda laamood waa in ay si kala madax-bannaan u shaqeeyaan. Madax-bannaanida laanta xeer-dejinta iyo ka hortagga ku-takrifaladdka awooda laanta fulinta waxay aas-aas u tahay dowladnimo iyo dimuqraadiyad caafimaad qabta, iyadoo la hubinayo nidaamka isu-dheelitirka awoodaha dowladda, kaasoo ka hortagaya in mid ka mid ah laamuhu helo awood xad-dhaaf ah, oo uu ku muquuniyo labada kale. Dastuurka Soomaaliya, sida inta badan dastuuradda dimuqraadiyada ku dhisan, waxaa loo qaabeeyey si cad in uu kala sooco awoodaha iyo hawlaha laanta xeer-dejinta iyo laanta fulinta.

Waa lagama maarmaan in la ilaaliyo madaxbannaanida laanta xeer-dejinta si loo xaqiijiyo maamulka wax ku oolka ah, oo u taagan mas'uuliyad iyo ilaalinta mabaadi'da dimuqraadiyadda. Mid ka mid ah mabaadi'da aasaasiga ah ee kala socda awoodaha dastuuriga ah ee saddexda laamood ee dowladdu ka kooban tahay waa in la mamnuuco dadka inay si isku mar ah u haystaan labadaba awoodood sida jagooyinka wasiirnimo iyo xildhibaan. Xilligan hadda ah ku dhawaad 60 ka mid ah 275 xildhibaan ee Barlamaanka federaalka ah ayaa ah xubno ka tirsan fulinta, taasoo xaddideysa awoodda laanta xeer-dejinta oo wakiil ka ah bulshada, taasina waxay wiiqeysaa kalsoonida bulshada ee hay'adaha dowliga ah.

Marka laanta fulintu ay xakameyso laanta xeer-dejinta, nidaamka maamul-wanaaga ee ah is-hubinta iyo isku dheelitirka awoodaha iyo mas'uuliyadda dowladda ayaa la burburinayaa. Mid ka mid ah tilmaamaha muhiimka ah

ee maamul-wanaaga Afrika waxaa lagu soo bandhigay tilmaanta Ibrahim ee lagu qeexo maamul-wanaagga Afrika (Ibrahim Index of African Governance - IIAG), kaas oo bixiya qiimeyn ku saabsan tayada maamul ee waddamada Afrika. IIAG waxay uruurisay 81 tilmaamood iyo 265 tilmaan-isbeddel oo ka soo baxay 54 mashruuc oo xog la ururiyey ah, iyadoo ka soo xiganeysa 47 ilo-xogeed oo madax-bannaan ee Afrika iyo caalamka.

Sanadka 2022, Soomaaliya waxay ku dhacdey kaalinta 53aad markii loo eego 54-ta dal ee Afrikaan ah, taas oo la macna ah in aan liiska ka galney meel hoose. Qiimeyntani waxay iftiimineysaa xaalada hadda jirta ee xaga maamul-wanaaga dalka Soomaaliya, taasoo muujineysa in baahi degdeg ah loo qabo in aan dib u qiimeyno nidaamkeena hab-maamul iyo dhaqan-dowladnimo.

## 2. XISAABIYAHA GUUD:

Xisaabiyaha Guud, wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa maaraynta nidamka maaliyadeed iyo xisaabinta ee dalka. Xafiiska Xisaabiyaha Guud ayaa maamula xisaabaadka miisaaniyadda qaran, maareeyana maaliyadda mid kasta oo ka mid ah hay'adaha dowliga ah, iyo bixinta kharashka qaranka, ka dib marka Baarlamaanka Federaalka uu ansixiyo miisaaniyadda. Intaas waxaa sii dheer, waxay mas'uul ka tahay kormeerida iyo xakameynta dhammaan ballanqaadyada dowladda, iyada oo uu bixinayo tilmaamo ku saabsan nidaamka xakameynta ballanqaadka dowladda iyo korjoogteyntooda, iyo sidoo kale hubinta dukumiintiga iyo warbixinta ballanqaadyada ay sameeyeen hay'adaha dowladda.

Xisaabiyaha Guud wuxuu kormeeraa ku-dhaqanka, hay'adaha dowladda ee miisaaniyadda iyo shuruucda maaliyadeed. Sharciga Maareynta Maaliyadda Dowladda (Public Financial Management Act) ayaa maamula qaab-dhismeed loogu talagalay doorka iyo waajibaadka Xisaabiyaha Guud. Sharciyadan waxay qeexayaan awoodaha iyo waajibaadka Xisaabiyaha Guud iyo xaqiijinta madax-bannaanidiisa, oo ay ku jiraan maaraynta hantida dowladda, kormeerka warbixinta maaliyadeed iyo xaqiijinta ku-dhaqanka, shuruucda maaliyadeed.

Madax-bannaanida Xisaabiyaha Guud waxaa taageera qaab dhismeedka sharciga, si loo xaqiijiyo heerka ugu sarreeya ee hufnaanta iyo mas'uuliyadda. Xisaabiyaha Guud waa hay'ad dowli ah oo madax-banaan, waana inuu u dhaqmaa si ka madax-banaan Wasaaradda Maaliyadda, taas oo keeneysa inay si madaxbannaan u fuliso waajibaadkeeda. Si kastaba ha noqotee, dowladihii Soomaaliyeed, heer dhexe iyo maamul-goboleed, ayaan siin mudnaanta uu leeyahay xafiiskan iyo madax-bannaanidiisa, iyagoo hoos dhigtay awoodda Wasiirka Maaliyadda, taas oo ka soo horjeeda sharciga.

## 3. XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD:

Xafiiska Hantidhawrka Guud, oo loo yaqaan Hay'adda Kormeerka Sare (Supreme Audit Institution), ayaa sameeya kormeer maaliyadeed iyo hantidhawr ku aadan dhammaan xisaabaha dowladeed si loo xoojiyo hufnaanta iyo masuuliyadda sida loo isticmaaley hantida dowladda. Taariikh ahaan, Xafiiska Hantidhawrka Guud ee Soomaaliya waxaa la aasaasay horaantii 1960-meeyadii ka dib madax-bannaanida Soomaaliya ee 1960. Si loo xoojiyo awooda sharci ee xafiiskan, waxaa la asteeyey Xeerka Maaliyadda Dowladda oo loo yaqaan Xeer No. 2, (Public Financial Act – Law No.2) ee soo baxay 29-ka Diseembar 1961, si uu u maamulo hay'adaha maaliyadeed ee dowladda Soomaaliya.

Sanadkii 1962, Xeer No. 317 ayaa dhaqan galay, si loo xadidio qaabdhismeedka maamulka maaliyadda dowladda. Burburka hay'adaha dowliga ah sanadkii 1991 ayaa keenay caqabado waaweyn oo horyaalka Xafiiska Hantidhawrka Guud (Office of Auditor General) maadaama dhammaan hay'adihii dowladu noqdeen kuwo aan jirin ama aan waxtar lahayn. Sannadkii 2012, dastuurka ku-meel-gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa aqoonsaday madax-bannaanida Xafiiska

Hantidhawrka Guud, kaasoo doonayay inuu door muhiim ah ka ciyaaro hubinta maareynta iyo hubinta isticmaalka maamliyadda dowladda Soomaaliya. Qodobka 114-aad ee dastuurku wuxuu qeexayaa madaxbannaanida la siiyay Xafiiska Hantidhawrka Guud, si loo dhiirrigeliyo hufnaanta, isla-xisaabtanka, iyo maamul wanaagga.

Si kastaba ha ahaatee, mid ka mid ah caqabadaha waaweyn ee soo wajahey Xafiiska Hantidhawrka waa ku-lug-lahaanshihiisa madaxa Xafiiska ee habka ansixinta kharashyada dowladda, taasoo ka soo horjeeda madaxbannaanidiisa iyo kormeerka wax ku oolka ah ee kharashyada dowladda. Doorkan la siiyey Xafiiska Hantidhawrka Guud wuxuu khilaafsna yahay madaxbannaanidiisa iyo awoodda uu u leeyahay inuu si wax ku ool ah u kormeero kharashka dowladda, maadaama uu qeyb ka noqdey nidaamkii kharash-bixinta, ayna u muuqato in uu isagu is-baarayo (self-review).

Arrin kale oo iyagana caqabad ku ah wax-qabadkiisa ayaa ah in uusan laheyn madaxbannaani miisaaniyadeed maadaama xafiisku uusan lahayn miisaaniyad u gaar ah oo ka madax-bannaan laanta fulinta. Ku tiirsanaantani waxay Xafiiska Hantidhawrka Guud ku haysaa saamayn aan habboonayn oo ka timaada dowladda, waana sida muuqata oo uu hadda la ilka-beelay xafiiskaasi, iyadoo waqtiyadii lixdamaadkii illaa tii kacaanka uu ahaa xafiis awood badan leh. Qaabka lagu magacaabo ama shaqada looga qaado Hantidhawraha Guud ayaa iyaduna keeneysa su'aal weyn xaga madax-bannaanidiisa. Arrimahaas oo dhan waxay khatar gelinayaan hufnaanta iyo madaxbannaanida xafiiska.

Dhacdo ugub ah waxaa aheyd in Ururka Horumarinta INTOSAI (INTOSAI Development Initiative) iyo AFROSAI-E ay soo saareen bayaan wadajir ah oo ku saabsan magacaabista Handidhowraha Guud ee Soomaaliya kadib markii dowladdu ay cayrisey Guddoomiyihii Xafiiska Hantidhawrka Guud ee dalka, ayna ansixisay magacaabista Guddoomiye cusub bishii Febraayo 2023 si lama filaan ah, iyagoo walaac ka muujiyey saamaynta taban ee suurtagalka ah ee ku iman karta madaxbannaanida Xafiiska Hantidhawrka Guud ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.

Labadaan hay'adood oo aad u taageera Xafiiska Hantodhawrka Guud ayaa xaqiijiyay in habka hadda jira ee xil-ka-qaadista iyo magacaabista Hantidhawrka Guud ee Soomaaliya uu ka soo horjeedo dadaallada qaran ee lagu dhisayo xeerar sharci oo waafaqsan mabaadi'da caalamiga ah ee la aqbalsan yahay iyo kuwa la taageeray ee ku xusan Bayaanka INTOSAI Mexico (INTOSAI Mexico Declaration), kuwaasoo dhamman ku saabsan madaxbannaanida Hay'adaha Hantidhawrka Guud, iyo in laga feejignaado xaalad kasta oo khatar gelinaysaa dhisidda hantidhawrka madaxbannaan, awoodna u leh wax ka qabato caqabadaha qaran ee la xiriira isticmaalka hantida dowladda, iyada oo la xoojinayo mas'uuliyaddaas, isla markaasna lala dagaallamayo musuqmaasuqa.

## 4. GUDDIGA LA-DAGAALLANKA MUSUQMAASUQA:

Guddiga La-Dagaallanka Musuqmaasuqa, wuxuu baaraa, kana hortagaa musuqmaasuqa, taasi oo kor u qaadaysa daahfurnaanta iyo hufnaanta maamulka dowladda. Doorkooda ayaa muhiim u ah si loo xoojiyo daahfurnaanta iyo hufnaanta hay'adaha kala duwan ee dowladda maadaama ay hirgelinayaan siyaasado iyo istiraatiijiyado looga hortagayo musuqmaasuqa. Sidoo kale, waxay qabtaan ololayaal wacyigelin dadweyne si loo kordhiyo fahamka saameynta xun ee musuqmaasuqa, iayagoo dhiirrigelinaya dhaqan ku dhisan anshax-wanaag.

Tusaalaha ugu wanaagsan ee muujinaya muhiimadda hay'adaha la dagaallanka musuqmaasuqa waxaa ah Guddiga Madaxa-bannaan ee La-Dagaallanka Musuqmaasuqa ee Hong Kong oo caan ku ah dadaalada ka dhanka ah musuqmaasuqa, iyagoo adeegsanaya nidaam isku-dhafka ah oo ka kooban nidaam ka-hortag, baaris, iyo dacwad-oogis, Sidoo kale, Xafiiska Baaritaanka Dhaqan-xumada ee

Singapore waa tusaale kale oo guuleystay, oo si weyn u yareeyey musuqmaasuqa iyada oo loo marayo hirgelin adag iyo wacyigelin bulshadeed.

Dhanka Soomaaliya, musuqmaasuqu wuxuu noqday mid baahsan, oo si weyn u hoggaaminaya shabakadaha danleyda qabiileysan ee hogaamiya hab-siyaasadeedka dhaqan-dhaqaale ee dalka. Sanadkii 2019, Madaxweynaha Maxamed Cabdullaahi Maxamed wuxuu saxiixay sharci ka dhan ah musuqmaasuqa. Sida la ogyahay sanadkii 2021, Soomaaliya waxay dhistay Guddiga Madax-banaan ee la-dagaalanka musuqa, oo loogu talagalay in uu hogaamiyo dagaalka ka dhanka ah musuqmaasuqa.

Si kastaba ha ahaatee, tallaabadaan waxaa soo wajahay dhaleecayn ka timid mucaaradka, kuwaas oo qiray in dowladda xil-gaarsiinta ah aysan lahayn awood ay ku ansixiso xubnaha guddiga. Waxaa kale oo tallaabadaan carqaladeeyay awoodda siyaasadeed ee dalka oo ku dhisan kooxo danley ah oo qabiileysan.

Nasiib-darro, Madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud ayaa kala direy Guddigii Ka-hortagga Musuqmaasuqa ee dalka sannadkii 2022 doorashadiisii kadib, wuxuuna amar ku siiyay Golaha Wasiirada inay sameeyaan guddi cusub, sida ku xusan Qodobka 112 ee Dastuurka Kumeel-gaarka ah ee Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, guddigaas weli lama magacaabin. Waxaa xusid mudan in Soomaaliya ay noqotay dowlad xubin ka ah Heshiiska Qaramada Midoobay ee Ka-hortagga Musuqmaasuqa (UNCAC) sanadkii 2021 xilligii dowladdii hore, iyadoo ballanqaadey inay xoojineyso oo ay kor u qaadeyso ka-hortagga musuqmaasuqa. Intaa waxaa dheer, dadaallada lagu cusbooneysiinayo nidaamka Maareynta Maaliyadda Dowladda, ayaa lagu daray Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP-9).

In kasta oo ay jiraan dadaallo badan, musuqmaasuqu wuxuu weli caqabad weyn ku yahay xasiloonida iyo horumarka dalka, waana dhaqan soo jireen ah bulshada Soomaaliyeed dhexdeeda sida uu lahaa Sayid Maxamed Cabdille Xasan AHUN (Musuqmaasuq Soomaali waa meheredeediiye).

Soomaaliya weli waxay la tacaaleysaa caqabadaha hirgelinta tallaabooyinka waxtarka leh ee ka-hortagga musuqmaasuqa iyo hubinta isla-xisaabtan dhab ah, sida ku xusan miqyaaska (Index) Aragtida Musuqmaasuqa ee Hay'ada Transparency International ee soo baxdey sanadkii 2023, dowladda Soomaaliya waxay heshay 11 dhibcood oo ka mid ah 100 dhibcood oo qiimeynta aasaaska u ah, taas oo ka dhigtay waddanka 180aad ee ugu hooseeya 180ka dal ee warbixinta laga qaadey. Taasi ma aha meel qurux badan oo lagu qanci karo dal ahaan iyo dad ahaanba.

Isku soo duuboo, guddiyada ka hortagga musuqmaasuqa ayaa door muhiim ah ka ciyaara difaacida daahfurnaanta hay'adaha dowladda iyo hubinta in dowladdu qaado talaabooyin cadcad oo keeni kara isla-xisaabtan dhab ah, taasoo ka qayb-qaadaneysa dhismaha dhaqan siyaasadeed oo ku dhisan daacadnimo iyo isla-xisaabtan, oo lagama maarmaan u ah horumarka guud iyo degenaanshaha dalka.

## 5. HAY'ADDA QARANKA EE WAX-SOO-IIBSIGA:

Waaxda ama Hay'adda Wax-soo-iibsiga Dowladda, waxay mas'uul ka tahay korjoogteynta habraacyada Qaranka ee Wax-soo-iibsigasa si loo helo daahfurnaanta iyo tartan cadaalad ku dhisan, loogana hortago musuqmaasuqa . Waaxda Qaranka ee Wax-soo-iibsiga waxay shaqo ahaan hoos tagtaa Wasiirka Maaliyadda.

Hawsha ugu weyn ee ay qabto waaxdu waa in ay bixiso qandaraasyada dalabyada dowladda dhexe iyo hay'adaha kale ee lagu xusey xeerka dib-u-eegista qaabka soo iibinta iyo bixinta qandaraasyadda la xiriira shaqooyinka, adeegyada, iyo alaabada loo baahan yahay, waxayna la socotaa diiwaangelinta iyo qiimaynta qandaraaslayaasha diyaar u ah inay la shaqeeyaan dowladda. Ujeedada ayaa ah in la hubiyo in mashaariicda si xaq ah loo maareeyey, lana xaqiijiyey in ay u dhiganto qiimaha la bixiyey (value for money).

Si kastaba ha ahaatee, Hay'adda Qaranka ee Wax-soo-iibsigu waxay wajahaysaa caqabado badan, oo ay ku jiraan faragelinta siyaasadeed iyo awood la'aan lagu maareeyo qandaraasyadda. Sidoo kale, waxaa jira arrimo la xiriira musuqmaasuq

iyo eex ka jira hay'adda dhexdeeda, iyo khibrad iyo tababar la'aan haysada hawlwadeenadda hay'adda, taas oo aad u adkeysa xaaladda. Waxaa xusid mudan inay jirto taageero siyaasadeed oo aan ku filnayn dadaallada isbeddelka loo baahan yahay, taas oo hakisey xawaaraha isbeddelada ku saabsan Hay'adda Qaranka ee Wax-soo-iibsiga daka, hoosna u dhigay waxtarkeeda iyo aqbalaadda bulshada.

## 6. URURADA BULSHADA RAYIDKA AH:

Ururada Bulshada Rayidka ah (Civil Society Organisations - CSOs) waxay u doodaan hufnaanta, maamul-wanaagga iyo isla-xisaabtanka, marar badan waxayna ka shaqeeyaan sidii loo ilaalin lahaa shaqadaas. Bulsho kasta, hay'adaha bulshada rayidka ah waxay ciyaaraan door muhiim u ah maamul-wanaag iyo horumarinta, waxayna u dhexeeyaan dowladda iyo muwaadiniinta.

Ururada Bulshada Rayidka ah waxay ka kooban yihiin ururo iyo hay'ado kala duwan oo u dooda danaha bulshada, kor u qaada qiyamka dimoqraadiga ah iyo talo-wadaag, isla markaana xoojiya ka qaybqadashada muwaadiniinta ee go'aanada masiiriga ah ee dowladda.

Si kastaba ha ahaatee, ururada bulshada rayidka ah (CSOs) ee wax ku oolka ah ma ahan kuwa si caadi ah loo horumariyo Soomaaliya heer dowlad dhexe ama maamul-goboleed, marar badana, ururadani waxay u shaqeeyaan sidii NGOs ku tiirsan naftooda, dhaqaale-doon ah, iyaga oo aan haysan kalsoonida bulshada, taasina waxay keentay inay ku guuldareystaan inay gutaan doorkoodii ahaa "qaybta saddexaad" ee bulshada (3rd sector of society).

## 7. WARBAAHINTA XORTA AH:

Warbaahintu waxay door muhiim ah ka ciyaartaa wacyigelinta dadweynaha, baaritaannada iyo shaacinta musuqmaasuqa, iyo la-xisaabtanka mas'uuliyiinta dowladda, iyadoo bixineysa macluumaad waqtigiisa ku habboon oo sax ah oo ku saabsan siyaasadaha, go'aanada, dhacdooyinka iyo tallaabooyinka ay qaadeyso dowladdu. Sidoo kale, waxay bulshada ka caawisaa in ay helaan macluumaad sax ah oo ay go'aan ku salayn karaan, waxayna u tahay madal lagu muujiyo aragtida dadweynaha. Warbaahinta madaxa bannaan waxay xoojisaa xasiloonida iyo hufnaanta dowladnimo, waxayna leedahay awood ay ku hagto ama ku beddesho jihada bulsho dhan. Waxaa badanaa loogu yeeraa awoodda afraad ee dowladnimada, maadaama ay si madax-bannaan u kormeerto saddexda awoodood ee kale (sharcidejinta, fulinta, iyo garsoorka), taasoo muhiim u ah ilaalinta daahfurnaanta iyo cadaaladda.

Dowladihii is-bada jooga ahaa ee Soomaaliya illaa 1969 waxay inta badan ku dadaaleen inay xadidaan xorriyadda warbaahinta, iyagoo xakameynaya helitaanka xogta (censorship), xakameynta mucaaradka iyo xog la'aanta dadweynaha, iyagoo saxaafadda xorta ah ku soo rogaya xeerar iyo caqabado qaanuuni ah oo xaddidaya awoodooda iyo shaqadooda. Inkastoo dastuurka Soomaaliya uu dammaanad qaadayo xoriyadda hadalka iyo warbaahinta, xaaladda xorriyadda saxaafadda Soomaliya ayaa walaac leh.

Saxafiyiintu waxay wajahayaan hanjabaado, xabsi, iyo awood-sheegasho ka imaanaya labada heer ee dowlad federaalka Soomaaliyeed (dowladda dhexe iyo maamul-goboleedyada), iyo sidoo kale dagaalyahannada xagjirka ah sida Al-Shabaab, oo gacan weyn ku leh dilka iyo cabsigelinta warbaahinta xorta ah.

Sidoo kale waxaa saxaafadda lagu aamusiyaa xadhig, xeer-dhaqameed, cadaadis siyaasadeed iyo isku dayo in la laaluusho, iyagoo abuuraya jawi adag oo khatar ku ah saxaafadda. Intaa waxaa dheer, muuqaalka saxaafadda ee Soomaaliya waxaa si weyn u saameeya siyaasadda saldhigga qabiilka ku dhisan, taasoo keeni kartay in lagu khasbo warbixino dan laga leeyahay iyo dhiirigelin ajendayaal gaar ah. Waxaa kale oo jira dhaqaale la'aan haysta xarumaha warbaahinta Soomaaliya taasoo sababta in warbaahintu ay si fudud ugu nuglaato faragelinta siyaasadeed iyo mid ganacsi, taasoo dhaawacda madaxbannaanida iyo kalsoonida bulshada.

Dhanka kale, caqabadaha ugu waaweyn ee haysta warbaahinta Soomaaliya waxaa ka mid ah heerka hoose ee aqoonta iyo tababarka weriyeyaasha, kuwaas oo badankoodu aan helin fursado joogto ah oo ay ku horumariyaan xirfaddooda saxaafadeed, gaar ahaan dhinacyada anshaxa suxufinimo, baaritaanka xog ogaalka ah, iyo ka hortagga wararka been abuurka ah. Intaa waxaa dheer, tiknoolajiyadda casriga ah ayaa saamayn weyn ku yeelatay qaab-dhismeedka warbaahinta dalka, iyadoo ay yaraadeen xarumaha warbaahinta rasmiga ah, taasoo keentay in dad badan ay xogta iyo wararka ka helaan ilo aan rasmi ahayn, gaar ahaan baraha bulshada, halkaas oo dad aan ahayn suxufiyiin xirfadleyaal ah maamulaan. Arrintani waxay keentay in si sahlan loo faafiyo macluumaadyo aan la xaqiijin ama been abuur ah, taasoo dhaawacaysa kalsoonida iyo hufnaanta warbaahinta Soomaaliyeed.

# GUNAANAD:

Guud ahaan, qormadan waxay ujeedadeedu tahay inay iftiimiso sababaha ka dambeeya fashilka maamulka dowladda iyo isla xisaabtan la'aanta hay'adaha hufnaanta iyo maamul-wanaaga Soomaaliya. Dagaalkii sokeeye ee daba-dheeraadey iyo dowlad-dhiskii Soomaaliya illaa sanadkii 2000 oo aad u tag-darnaa ayaa si weyn u naafeeyey ama una burburiyey hay'adihii muhiimka ahaa ee maamul-wanaaga iyo hufnaanta, iyadoo si weyn u hor istaagtay soo-kabashada dalka oo ka socda xaalad jilicsan (fragile state). Inkasta oo uu jiro dadaal lagu doonayo in dib loogu habeeyo nidaamka maamulka dowladeed ee Soomaaliya, xukuumadihii isku xigay ayaa gabi ahaanba ku fashilmay inay si habboon oo sax ah dib ugu dhisaan hay'adahaas, taasoo waxyeello weyn u geysatay badbaadada dalka iyo badqabka shacabka.

Haddii aan la helin dadaal mug leh oo ku habboon samatax-bixinta hay'adahaas, mustaqbalka dalka ayaa u muuqda mid madow. Maamul-wanaagsan, hufnaan, musuq la'aan iyo mas'uuliyad wadareed waa aasaaska bulsho guulaysata iyo horumar waara. Arrimahaas oo dhan waxay dhisayaan kalsooni, kor u qaadayaan ka-qaybgalka bulshada, waxayna xaqiijiyaan maamul waxtar leh iyada oo la marayo dariiqa hufnaanta iyo sinnaanshaha, labadaas mabda' ayaana abuuraya nidaam cadaalad ku dhisan, waxtar leh, oo ka jawaaba baahiyaha bulshada.

Hoggaamiyayaasha siyaasadeed ee dalka ee heer gobol iyo dowlad-dhexe waa in ay kor u qaadaan dib-u-dhiska maamulka dowladda iyo daadejintiisa nidaamka federaaka illaa heer tuulo, dib-u-dhis fiicana ku sameeyaan hay'adaha mas'uul ka ah arrimaha maamul-wanaaga, hufnaanta iyo la dirirka musuqmaasuqa, si ay u suurtogasho in dalku mar dambe lugihiisa ku istaago, loona ilaaliyo madaxbannaanidiisa siyaasadeed iyo helitaanka ixtiraamka masraxa caalamiga ah.

**W/Q:** Cali Xaaji Warsame MBA MA CPA CGMA

Agaasimaha Fulinta – Machadka Hiil
Email: ali.warsame@eau.edu.so
Tel: +252 90 7792 777 (Local Tel)

Tel: +254 7 16079177 (WhatsApp)



Xigashada Sawirka: AI (Garaadka macmalka ah)



Xigashada Sawirka: AI (Garaadka Macmalka ah)

# CURASHO BULSHO:

## Qof ilaa Qaran

Xildh. Cabdullaahi Faarax Mire

Dib u milicsiga taariikhda iyo horumarka bulshooyinka adduunka, waxa innooga soo baxaysa in aasaaska dhammaan isbeddellada waaweyn iyo ilbaxnimada ay sal u tahay "Curasho Bulsho". Eraygan waxa uu xambaarsanyahay macno qoto dheer oo sharraxaya habka ay bulshooyinku u kobcaan, isugu xirmaan, una gaaraan heer sare oo horumar ah. Curashada Bulsho waa geedi socod isku dhafan oo uu ka qayb qaato qof kasta oo bulshada ka mid ah, kana bilaabma heer qofeed ilaa heer qaran.

Ugu horrayn, curashada bulshadu waxay ku salaysan tahay fahamka qofka ee doorkiisa iyo masuuliyaddiisa bulshada dhexdeeda. Qof kasta oo shaqsi ah oo Soomaali ah, haddii uu fahmo inuu yahay qayb muhiim ah oo ka mid ah guud ahaan bulshada, wuxuu ku dhiirranayaa inuu wax ku biiriyo oo uu ka qayb qaato horumarka. Tani waxay ka dhigan tahay in qofku uu yeesho wacyi ku saabsan baahiyaha bulshadiisa, dhibaatooyinka ay la kulmaan sida amni darrada, abaaraha, iyo shaqa la'aanta, tabba gal la'aanta nidaam dowladnimo oo tayo leh iyo fursadaha jira ee lagu xallin karo. Waxa kale oo ay dhiirrigelisaa in la yeesho dareen iskaashi iyo damqasho, oo aan la isku koobin danaha gaarka ah ama midda qabiilaysan. Waa in qof kasta oo Soomaali ah uu dareemo in horumarka dalkiisu uu ku xiran yahay, kana bilawdo kaalintiisa.

Marka labaad, curashada bulsho waxay si weyn ugu xiran tahay waxbarashada iyo aqoonta. Bulsho aan wax baran, oo aan aqoon kororsan, ma gaari karto heer sare oo horumar ah, gaar ahaan xaaladda Soomaaliya. Waxbarashadu waa furaha iftiimiya maskaxda qofka, kuna dhiirrigeliya inuu u fekero si qoto dheer, uuna la yimaado xalal cusub, iyo fahm ballaaran ee dunida. Bulshada waxbaratay waxay noqotaa mid leh hal-abuur, oo awood u leh inay la jaanqaaddo isbeddellada adduunka, isla markaana ay abuurto fursado horumarineed oo cusub. Waxay kale oo ay yareysaa jahliga iyo fikirradaha xagjirka ah ee dib u dhiga bulshada, kuwaas oo ah kuwo in badan ragaadiyey bulshada Soomaaliyeed. Waa in la xoojiyaa waxbarashada heer kasta, laga bilaabo dugsiyada hoose ilaa jaamacadaha, si loo helo jiil aqoon iyo xirfad leh oo inoo horseeda xasillooni dhan kasta ah.

Intaa waxa dheer, curashada bulsho waxay ka dhalataa hoggaan wanaagsan iyo maamul hufan. Hoggaamiyeyaasha dhabta ah maaha kuwa isku kooba awoodda ama danaha gaarka ah u adeegsada, balse waa kuwa u adeega shacabkooda, una diyaariya jawi u sahlaya inay horumar gaaraan. Maamulka hufan ee daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka ku dhisan, wuxuu abuuraa kalsooni dadweyne, wuxuuna dhiirrigeliyaa iskaashiga u dhexeeya dowladda iyo shacabka. Tani waxay keenaysaa in ilaha dhaqaalaha iyo fursadaha horumarineed loo isticmaalo si cadaalad ah oo waxtar leh. Hoggaamiyeyaasha siyaasadda, culimada, iyo hoggaamiyeyaasha dhaqanka dhammaantood waxay leeyihiin door muhiim ah oo ah inay ummadda u jihaynayaan dhanka horumarka iyo iskaashiga.

Ugu dambayn, curashada bulsho waa mid ku dhisan dulqaad, isfaham, iyo isku tanaasul bulsho. Bulsho meel ku nool lagama waayo kala duwanaansho iyo khilaaf, balse waxaa la isku dhaafay samirka istaraatiijiga ah, kaas oo ah mid si miyir qab ah loo sameeyo iyada oo la xeerinaayo yool fog oo la rabo in la gaaro. Si loo gaaro horumar, waxaa lama huraan ah in la yeesho dulqaad, la isfahmo, laguna heshiiyo in la wada noolaado si nabad ah. Isku tanaasulka iyo in awood loo yeesho in laga gudbo khilaafaadka yar yar, waxay u gogol xaaraan in bulshadu ay diiradda saarto danta guud iyo mustaqbalka fog. Waa in la dhisaa buundooyin isku xira qeybaha kala duwan ee bulshada, laguna xoojiyaa midnimada iyo isku duubnida ku xiran yoolal qaran.

## KAALINTA DIINTU KU LEEDAHAY CURASHADA BULSHADA

Malik Bin Nabi, oo ahaa qoraa iyo falsafad yahan reer Aljeeriya ah, wuxuu si qoto dheer uga faallooday curashada bulsho iyo sida ay bulshadu u kobocdo. Wuxuu bulshada u arkay inay tahay nidaam nool oo firfircoon, kaas oo ku dhisan shabakad xiriirro bulsho oo xooggan, isla markaana leh ujeedooyin cadcad oo wadajir ah. Sida uu Bin Nabi qabo, diinta ayaa ah saldhigga curashada iyo horumarka bulshada.

Diintu fikirkiisa ma aha oo kaliya qiyam iyo caqiido, balse waa mid mideeya dadka, dhiirrigeliyana iskaashi iyo wada-noolaansho. Diintu waxa ay nolosha qof kasta iyo bulshada guud ahaan siisaa jihayn, iyadoo abuuraysa himilooyin wadajir ah. Diintu waxay suurta galisaa in bulshadu ay hesho jihayn iyo isbeddel joogto ah oo ku saleysan qiyam iyo anshax wanaagsan. Si tan loo gaaro, hay'adaha bulshada gaar ahaan culimadu, iyo hoggaamiyaasha bulshadu waa inay noqdaan kuwo madax-bannaan, oo aan hoos tegin awood

iyo saameyn siyaasadeed oo aan xeerinayn jihaynta wanaagsan ee bulshada. Haddii hay'adahaasi ay si toos ah uga qayb qaataan dhismaha qiyamka iyo anshaxa, waxay kobcin karaan bulsho adag oo isku duuban.

## ASTAAMAHA BULSHADA TAYADA LEH.

Shirkadda RAND Corporation oo ah hay'ad cilmi-baaris ayaa diraasad ballaaran samaysay oo ay ugu magac dartay "Aasaaska Bulsho ee Tartanka Qaramada" taas oo ay ku aqoonsatay todoba sifo oo waaweyn kuwaas oo si joogto ah loola xiriiriyo bulshooyinka iyo qaramada guulaha gaaray:

1. Hami iyo Rabitaan Qaran (National Ambition and Will): Tani waxay tilmaamaysaa dadaal wadajir ah iyo go'aan ku dhex jira bulshada si loo gaaro yoolalka qaran, loona ilaaliyo dareen leh ujeeddo, iyo macne. Waxaa lagu soo koobi karaa in la helo bulsho leh hami iyo rabitaan qaran, kaas oo qof walba diyaar uu u yahay in uu naftiisa u huro sidii hormar looga gaari lahaa.
2. Aqoonsi Qaran oo Midaysan (Unified National Identity): Dareen xooggan oo ah aqoonsi iyo hayb la wadaago, iyo ujeeddo guud oo ay yeeshaan dadweynuhu ayaa ah sifada labaad. Tani macnaheedu waa in la helo ballanqaad wadajir ah oo ku saabsan mabaadi'da, hay'adaha, iyo mustaqbalka qaranka, taas oo kobcisa isku-xirnaanta bulsho iyo xasilooni.
3. Fursad La Wadaago (Shared Opportunity): macanaheedu waa in dhammaan muwaadiniintu helaan fursado siman oo waxbarasho, horumar dhaqaale, ka qaybgal bulsho, iyo horumar shakhsi ah. Marka dadku dareemaan inay leeyihiin fursad cadaalad ah oo u suurta galin karta inay guuleystaan, waxay soo saartaa awoodda bini'aadamka, waxayna yareysaa khilaafka bulshada.
4. Dowlad Firfircoon (An Active State): Bulsho tayo leh waxa ay fursad u heshaa xukuumad leh karti iyo waxtar oo si firfircoon u dhiirigelisa danaha qaranka, kobcisa hal-abuurka, bixisa adeegyada bulsho ee muhiimka ah, oo abuurta deegaan ku habboon bulsho caafimaad qabta oo tartan la gali karta bulshooyinka dhiggeeda ah. Tani waxay xiriir la leedahay helitaanka qorshe istaraatiijiyadeed, iyo in la helo xukuumad ka soo bixi karta ballanqaada ku aaddan horumarka qaranka.
5. Hay'ado Wax Ku Ool Ah (Effective Institutions): Hay'ado guud iyo kuwo gaar ah oo adag, la isku halleyn karo, oo la qabsi leh (tusaale ahaan, nidaamyada sharciga, nidaamyada waxbarashada, hay'adaha maaliyadda, ururada bulshada rayidka ah I.W.M). Hay'adahani waxay bixiyaan qaab-dhismeedka nidaamka bulsho, dhaqaale, iyo tallaabo wadajir ah, iyagoo hubinaya cadaalad, saadaalin, iyo hufnaan.
6. Bulsho Wax Barata oo La Qabsi leh (A Learning and Adapting Society): Awoodda bulsho waxaa saldhig u ah waayo-aragnimada, hal-abuurka, iyo sida ay ula qabsato caqabadaha cusub, oo ay u aqbasho isbeddelka. Waxaa astaan u ah sida ay ugu jajabantahay waxbarashada iyo aqoonta, cilmi-baarista saynis, horumarka tignoolajiyadeed, iyo baraarug isla xisaabtan.
7. Kala Duwanaansho iyo Isku-Takoor La'aan Tartan (Competitive Diversity and Pluralism): waxaa astaan u ah deegaan dhiiri galiya kala duwanaanshaha, aqbali kara, suurta galin kara is-fahan, iskaashi iyo wax wada qabsi. Waa in la kobciyo dulqaadka loo leeyahay kala duwanaanshaha, waana midda suurta galisa curashada doodo bulsho oo xooggan, oo dhaliya is-fahan iyo hal-abuur.

## GABAGABO

Gabagabadii, curashada bulsho maaha mashruuc hal mar la fuliyo oo la dhammeeyo, balse waa geedi socod u baahan dadaal joogto ah, ka go'naan, iyo iskaashi ballaaran. Waxay u baahan tahay in qof kasta oo Soomaali ah uu fahmo doorkiisa, waxbarashada fursadaheeda iyo tayadeeda la ballaariyo, hoggaan wanaagsan la helo, dulqaad iyo isfaham la yeesho. Marka ay bulshada Soomaalidu si wadajir ah uga shaqeeyaan yoolkan, waxa ay gaari kartaa heer sare oo horumar ah oo ay ku hanan karaan nolol wanaagsan, wadajir, iyo barwaaqo. Curashada Bulsho waa riyadii ay rabeen dadkii hore, waana midda aasaaska u ah mustaqbal ifaya oo ay Soomaalidu ka gaari karto meel wanaagsan adduunka. Diintu waa laf-dhabar, tilmaamaha bulshada tayada lehna waa lama huraan.

**W/Q:** Xildh. Cabdullaahi Faarax Mire



Xigashada Sawirka: Public Domain

# CONFEDERAL-KU WAA TALLAABO HORDHAC AH OO SOOMAALI LAGU KALA GOYNAYO

Dr. Maxamed Cali Faarax

# HORDHAC

Qoraal uu Wasiir Cabdi Faarax Juxa soo dhigay bartiisa Facebook-ga 16-kii May 2025-ka ayuu cinwaan uga dhigay: "Dhammaadka Jamhuuriyaddii 3-aad iyo bilowga Jamhuuriyaddii 4-aad oo Confederal ah", wuxuuna qoraalkiisa ku yiri: "Xashan Shiikh Maxamuud (XSM), wuxuu ku suntanyahay architect-ga iyo aabbaha burburinta hannaanka Federaaliga ah ee dagaalkii sokeeye kadib lagu heshiiyey. Muddo xileedkiisii 1-aad ee 2012 ayuu Madaxweyne XSM aragtida Federaal diidka ah bilaabay oo is-hortaagay dhismihii maamul goboleedka Jubbaland, waxaana halkeedii kasii waday markii dambe Madaxweyne Farmaajo 2016-2022 oo bilaabay inuu tuuro Madaxweynayaasha Maamul-goboleedyada xilligaas".

Gabagabadii, wasiirku wuxuu qoraalkiisa kusoo afmeeray sidan: "Ugu dambayn, Confederal-ku waa jawaabta iyo xalka dhalashada Jamhuuriyadda 4-aad ee Dawlad-dhiska Soomaaliya, wuxuuna is waafajinayaa 3-dii aragtiyood ee doodda dawlad-dhiska Soomaaliya ee kala ahaa: A) Kala go-Somaliland B) Federal-Puntland C) Hannaan dhexe-Soomaaliya. Saddexdaas aragtiyood iyo saddexdii dhinac ee loollamayey ee Puntland, Somaliland iyo Soomaaliya waxay ku midoobi karaan hannaanka Confederal- ka oo noqon kar mid usha iyo miisaanka dhexda dhiga."

Qoraalkaas, waxaan oran karaa waa aragti u gaar ah Wasiir Juxa oo uu in muddo ahba riixayay, goobo fara badanna uu kaga hadlay "Nuclear option" iyo erayo la mid ah, waa aragti fog oo xagjirnimo ku dahaarantahay, waana qoraal dhiirrigelinaya in Soomaali kala go'do, sii kala fogaato, Puntland oo hormuud u ahayd halgalkii gobannima-doonka, iyo gumaysiga oo laga xoroobana, ugu gacan-haatinaya inay Soomaali ka go'do oo ay gooni u baxdo.

Qoraallada noocaan oo kala ahi waxay abuurayaan dad u fakara sida Maraykanka cad oo uu Trump hor boodayo, aaminsan cunsuriyad, umana qalanto Puntland oo 27 sano jirsatay, horseedna u ahayd, dib u dhiska dowladnimada, nidaamka federaalka iyo doorashooyinka golayaasha deegaanka inay maanta kasoo ifbaxdo fikrado xagjir ah oo Soomaali sii kala fogaynaysa.

# YAGLEELIDDII JAMHUURIYADDII 3-AAD EE SOOMAALIYA

Jamhuuriyaddii 3-aad ee Soomaaliya, waxaa dhismaheeda loo maray dadaal dheer oo muddo 10 sano ku dhow la dhaad-dhaadayay, 14 shir oo ka dhacay dalka dibaddiisa, waxaa lagu soo afmeeray shirkii Carta oo sanadkii 2000 lagu qabtay magaalada Carta ee dalka Jabuuti, kaasoo dhidibbada loogu taagay dowladnimadii Soomaaliya ee burburtay, waxaana saldhig looga dhigay nidaamka federaalka si laysugu hayo bulshada Soomaaliyeed oo ku kala irdhooday dagaalladii ahliga ahaa ee dalka ka dhacay burburkii dowladda dhexe kadib.

Soomaalidu waxay sharci ahaan iyo siyaasad ahaan ugu heshiiyeen inay qaataan nidaam federaal ah, balse intay wada fariisteen islama ay meel dhigin qaabkii loogu dhaqmi lahaa nidaamka federaalka ah, taasoo keentay in khilaaf joogta ah yimaado. Dunida kama jiro federaal isku nooc ah ama hal qaab ah, balse qolo walba siday ugu heshiiyaan ayay ugu dhaqmaan.

# WAA MAXAY CONFEDERAL?

Confederal waa dowlado kala madax-bannaan oo si tadawuc ah u samaysta madal ay ku midoobaan oo wax ka qabta qadayidaha muhiimka ah oo ka dhexeeya sida: difaaca wadaagga ah, xiriirka arrimaha dibadda, ganacsiga oo laysku furo, isu-socodka iwm. Waxaa tusaale loo soo qaadan karaa Midowga Yurub (EU) oo ah dowlado madax bannaan dhammaantood, balse wadaaga arrimaha qaarkood.

Soomaaliya maanta uma baahna in la kala gooyo, Confederal loo gacan-haatiyo, dowlad-goboleed walbaana gaar u baxdo, balse waxaa habboon in madaxda Soomaalidu ka shaqeeyaan sidii Soomaali laysugu soo dhawayn lahaa, cidda maqan loo raadin lahaa, waxa maamul ahaan iyo siyaasad ahaan ka khaldanna loo sixi lahaa; si loo taabagaliyo dowlad xooggan oo hay'adaheeda dastuuriga ahina u dhamaystiran yihiin.

# CADOWGA SOOMAALIDA EE SOO JIREENKA AH

Soomaalidu cadow badan ayay leedahay, kaasoo raadinaya inay noqoto dowlado yaryar oo si fudud loo muquunin karo, dabadeedna khayraadka iyo dalkaba loola wareego. Waxaa la wada ogsoon yahay hagardaamada gumaystihii caddaanka ahaa ee Ingiriiska iyo Talyaaniga, kaasoo dhulka Soomaalida shan qaybood u qaybiyay, labadii midowday iyo Jabuuti oo dolwad xor ah noqotay mooyee, labadii kale waxaa lagu kala daray Kiinya iyo Itoobiya.

Waxaa taariikhda ku cad in Itoobiya ay dhulka Soomaalida weligeed duullaan ku ahayd, waxay goob-joog ahayd qaybsigii Afrika ee ka dhacay magaalada Berlin ee dalka Jarmalka muddadii u dhaxaysay 1884-1895-tii, waxaa gumaystaha Ingiriisku ku wareejiyey dhulka Soomaalida degto ee loo yaqaan Soomaali Galbeed sanadihii 1944-tii iyo 1954-tii.

Marwalba Itoobiya indhaha ayay ku haysay xeebaha Soomaalida, Menelik oo ahaa Boqorkii Shawa ee Itoobiya ayaa warqad u qoray madaxda Talyaaniga, Faransiiska, Jarmalka iyo Ingiriiska isagoo ka cabanaya gacan ku haynta Muslimiinta ee dhulka ku teedsan xeebta, taasoo fure u ah Marinka Babel Mandab, sida Xaafuun iyo Saylac, waxayna ka xireen in Itoobiyo hesho marin biyood ganacsigu usoo maro, wuxuuna isla warqaddaas ku beerlaxawsaday inuu yahay Kirishtaan ayaga la mid ah. (Which way to the Sea, please? Horn of Africa Journal: Oct/Dec 1978).

Damaca Itoobiya waxaa kaloo tusaya warqadda uu Wasiir-kuxigeenka Wasaaradda Arrimaha Dibadda Itoobiya Weld Forester 10-kii bisha November 1947-dii u qoray Bevin oo ka tirsanaa madaxda dawladda Ingiriiska, asagoo leh: "Waxaan wax badan sugeyney in naloo soo celiyoo dekadahayagii qadiimiga ahaa si markale calankayagu uga babado badaha adduunka. Ilaa iyo intii shisheeyuhu qabsaday dhulkayaga Eritrea iyo Italian Somaliland, waxaan sugaynay in loo soo celiyo dalkoodii hooyo ee Itoobiya. Inkastoo la wada ogsoon yahay in labadaas gobol ay ka tirsanaan jireen Itoobiya, haddana waxay in badan ku jireen gacan shisheeye". (Taariikhda Soomaalida iyo Tartanka Qabiilka: 2010).

Warqaddaan oo laga helay maktabadaha Ingiriiska, waxay markhaati ka tahay in Itoobiya weligeed ku taamaysey inay la wareegto dhammaan dhulka Soomaalida.

Bishii Janaayo 2024-kii, madaxweynihii hore ee maamulka Somaliland Muuse Biixi Cabdi ayaa Itoobiya la saxiixday heshiis isfaham kaasoo Itoobiya siinaya marin badeed 20 km oo biyaha Badda Cas ee xeebaha Somaliland, taasoo dibada u soo saartay damacii mudada dheer ee Itoobiya oo ah dal aan lahayn bad (landlocked) ay ku doonaysay in ay hesho marin biyood kadib markii ay lumisay marin badeedkeedii 1993-dii markii Eritrea ay ka go'day oo ay noqotay dal madax-bannaan.

Dhinaca kale; waxaa Soomaalidu halgan dheer u galeen inay heeryada gumaysiga iska dul-qaadaan, dalkoodana cadowg ka xoraystaan, Sayid Maxamed ayaa dhammaadkii qarnigii 19-aad bilaabay halgan gobannima-doon ah oo uu doonayay in dalka looga xoreeyo gumaystaha caddaanka ah ee kusoo duulay, wuxuuna abaabulay halgamayaashii la magac baxay Daraawiish oo Ingiriiska dharbaaxooyin lama illaawaan ah gaarsiiyay.

Waxaa sidoo kale xoraynta dalka Soomaaliya naf iyo maalba u huray dhallinyaradii SYL, kuwaasoo dalka oo dhan ka abuuray dhaqdhaqaaq gobannimadoon ah oo ku baahay dhammaan deegaannada Soomaalida, wuxuuna halgankaasi socday ilaa la gaaray xornimo dhamaystiran 1-dii Luuliyo sanadkii 1960-kii.

Ugu dambayntii, aragtida cusub (Confederal) ee Wasiir Juxa soo bandhigay maaha mid u adeegaysa wadajirka, midnimada iyo isku haynta bulshada Soomaaliyeed oo ay kalsooni darrada xooggani dhextaallo, una baahan in laysku soo dhaweeyo, khilaafaadka dhexyaallana xal loo raadiyo, dowlad xooggan oo ay heshiis ku yihiinna loo dhiso.

Waxaa habboon inaan la nimaano aragti hoggaamineed oo wax dhisaysa, xoojinaysa Qarannimada Soomaaliyeed iyo nidaamka federaalka ah ee lagu heshiiyay, si cilmi ahna uga hortagaysa aragtiyaha u sacab tumaya dowlad dhexe oo awoodaha oo dhan maroorsata.

Soomaaliya ha noolaato.

**W/Q:** Dr. Maxamed Cali Faarax

# DAREENKA MASUULIYADA IYO HUFNAANTA HOGAAMIYAHA:

"Halbeegyadaga Hogaaminta Wanaagsan"

Cabdiraxmaan Shiikhdoon



Xigashada Sawirka: Public Domain

Hufnaanta hogaamiyaha iyo dareenka masuuliyaddu waa arrimaha saldhiga u ah maamul wanaagga iyo hawl gudashada cid kasta oo shaqo loo idmaday. Nidaamka dawlad wanaaggu (Good Governance) waa mid ka mid ah waxyaabaha seeska u ah maamul kasta oo siyaasadeed oo guulaysta. Sidaas darteed, ayey maanta dowlado badani waxa ay xoogga saareen fulinta nidaamka dowlad wanaagga, kaas oo ay dhaqan gelintiisa ka dhalato horumarka, wanaagga bulshada, adkeynta cadaaladda iyo sharciga oo aasaas u ah noloshada bini-aadanka. Dhinaca kale waxa jira dalal badan oo ay Soomaaliya safka hore kaga jirto oo la daalaa-dhacaya musuq iyo maamul xumo ay sabab u tahay hufnaan iyo dareen la'aanta hogaamiyaasha siyaasadeed.

Dareenka masuuliyadda iyo hufnaanta hogaamiyuhu waa arrimaha lama huraanka u ah in uu hogaamiyuhu noqdo mid guulaysta. Arrimahani ma aha kuwo la ogaaday xilliyadii fufka aqoonta hogaaminta, ee waa kuwo horey u jiray oo ay diinta Islaamkuna dhidibada u sii taagtay. Waxaa laga soo xigtay Abuu Bakar in uu yiri: "Ma ahi midka idiinku wanaagsan ee waxa la ii doortay in aan idin hogaamiyo. Haddii aan wax saxo, i taageera, haddii aan wax khaldana, i toosiya", oraahdaan waxaa ka muuqda dareenka masuuliyadeed oo ah in wax la qabto iyo hufnaan oo ah in la saxo haddii uu khaldamo hogaamiyuhu. Sidoo kale arrintani waxa ay muujinaysaa sida ay bulshadu uga qayb qaadato ama uga fal-celiso go'aannada dowladda oo codkooda loo tixgeliyo (the power of the citizen's voice). Codka bulshadu waxa uu qaabeeya siyaasadda iyo xeerka dowladda. Arrintani waa mid aan laga heli karin hogaamiyaal badan, gaar ahaan Soomaaliya oo maanta u ooman hogaaminta wanaagsan, si looga baxo dhibaatooyinka fara badan ee haysta dalka iyo dadka.

# DAREENKA MASUULIYADDA

Isla-xisaabtanka (accountability) iyo dareenka masuuliyadu (feeling responsibility) waa in mas'uulka xilkiisa u gutaa si ku salaysan danta guud oo ku dhisan caddaalad iyo sinnaan u dhaxeysa bulshada uu u adeegayo. Sidoo kale, waa in hogaamiyhu qaataa natiijada (samaan iyo xumaan) ka dhalata go'aanada uu gaaro. Dareenka masuuliyadda waxaa tilmaan inoogu filan, Cumar Ibnu Khadaab oo habeen guuraynaya si uu ugu kuurgalo xaaladda dadka, ayaa maqlay caruur ooyaysa, ka dibna caruurta hooyadood ayaa u sheegtay in carruurtu ay la ooyayso gaajo darteed. Cumar waxa uu dushiisa ku soo qaaday raashin uu ka soo soo qaaday kaydkii muslimiinta, dabadeedna, wuu u kariyay oo afka ugu guray, kama tegin ilaa ay dhergeen oo ay ciyaareen. Cumar waxa uu diiday in raashinka laga qaado, wuxuuna ku jawaabay:"Aniga ayaa qaadaya raashinka, maxaa yeelay aniga ayaa aakhiro ka masuul ah". Aadan Cadde oo dareemayey khatarta hay'adaha kiristaanka ah ee dalka joogay xilligii xukun hoosaadka iyo masuuliyadda ka saran dadka iyo diinta, waxaa uu yiri: "Baahi weyn ayaan u qabnaa taageerada xagga waxbarashada iyo caafimaadka, laakiin, iyamaa badan khatarta iyo faa'iidada aan ka helayno. Su'aashaas ayaa u baahan inaan kaga jawaabno kulunka golaha ku-meel-gaarka ah ee soo socda".

# HUFNAANTA HOGAAMIYAHA

Hufnaantu (Integrity) waa qiyam (value) la xiriira ammaanada, daacadnimada, iyo in mudnaanta la siiyo danta guud, lagana fogaado eex iyo nin jeclaysi. Sidoo kale waa in laga fogaado in shaqo loo qabto ama la joojiyo shaqo si loo helo dan u gaar ah masuulka naftiisa, xigtadiisa, xididkiisa iyo saxiibadiis (conflict of interest). Aynu is barbar dhigno hadalo ay jeediyeen madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud iyo madaxweyne William Ruto, si aynu u arago hufnaanta dhabta ah ee laga rabo hogaamiyaha. Xasan Shiikh waxaa uu yiri: "In aan madaxweyne noqday, gabadha iyo wiilka aan dhalay, kan aan abtiga u ahay iyo kan aan adeerka u ahay xuquuqdii uu lahaa muwaadin kasta ayey leeyihiin mana gafayaan". Waa arrin sax ah in ay xaqooda muwaadinimo helaan, waase in ay dadka ula sinnaadaan. Dhinaca

kale, Ruto waxa uu yiri: "Xubnaha qoyskeygu ka qayb qaadan mayaan wax siyaasad ah, ma oranayo kama qayb galeyaan, haday doonaan way ka qayb geli karaan, laakiin si cad ayaan u go'aansaday, in uu qoyskayga ku filan yahay in shacabka Keenya ay igu sharfeen in aan u noqdo madaxweyne. Xaq uma lihi, in booska aan joogo aan ku dalacsiiyo qoykeyga, waase in aan ku dalacsiiyo caruurta dadka kale, si ay u helaan fursada aan helay oo kale. Taasi waa sababta aan dood adag ula gelayo dadka ila baratamayey ee magacaaba gabdhahooda, iyo ilama adeeradood. Ma filayo in taasi ay tahay sida ugu wanaagsan ee loo adeegsado fursadaha, waase in fursadaha la baahiyo, haddii la helana la siiyo cid kale, si kor loogu qaado oo ay wax u noqdaan, laakiin yeysan fursaduhu ku meeraysan hareerahaaga". Bal u fiirso, wasiir hor fadhiya guddigii baarlamaanka ee u xilsaarnaa la xisaabtankiisa oo haddana la hor fadhiya in uu shaqaalaysiinayo reerkiisa haddii uu fursad helo. Arrintani, waxa ay i xasuusisay, sheeko mala awaal ah oo ku saabsan nin mukhaayad ka shaqeeya oo dadkii u keenay biyo uu faraha kulo jiro. Markii la weydiiyey sababta uu faraha u geliyey biyaha ayuu ku jawaabey: "Aniga waxa iga daran ninkii biyaha ii soo dhiibay oo berkada ku dhex jiray, anigu faraha keliya ayaan geliyey biyaha"!

Dhinaca kale, daahfurnaanta ayaa xoojinaysa hufnaanta. Daahfurnaantu waa in si cad oo aan qarsoodi ahayn loo soo bandhigo dhammaan go'aamada, qorshayaasha, siyaasadaha iyo adeegayada bulshada loo qabanyo, lana sheego shuruudaha iyo halbeeyada lagu qiyaaso waxqabadka, si loola socdo hufnaanta iyo sinaanta waxqabadka maamulka (Wax la qariyey qurun baa ku jira). Tusaale ahaan, daahfurnaantu waa sida dhalada ama caaga cad ay uga dhex muuqdaan waxa ku dhex jira. Waxaa marag inoogu filan heerka aan ka taaganahay daahfurnaanta, heshiiskii lala galay Turkiga oo ahaa mid qarsoodi ah iyo kuwo kale oo qarsoon oo lala galay shirkado iyo dalal badan oo ku saabsan kaluumaysiga, adeegyada, qandaraasyada, macdanta iyo shidaalka. Inta badan hogaamiyaasha Soomaalidu kama warbixiyaan safarada ay dalka dibadiisa ku tagaan, iyadoo ay dhacdo in mararka qaarkood ay soo galaan heshiisyo siyaasadeed iyo kuwo dhaqaale ku lug leh.

## MAXAA KA DHASHAY DAREEN IYO HUFNAAN LA'AANTA HOGAAMIYAHA?

Musuq maasuqa baahsan iyo deganaansho la'aanta siyaasadeed ee dalka ka jirta waxaa sabab u ah hogaamiyaasha siyaasadda Soomaaliya oo aan lahayn dareen masuuliyadeed iyo hufnaan hogaamiye. Musuqa ka jira dhanka maamulku iyo siyaasadu waa kuwa ragaadiyey hanaanka maamulka iyo horumarka dalka. Magacaabista shaqaalaha kuma xirna aqoonta, hufnaanta iyo kartida ee waa mid ku timaadda eex iyo nin jeclaysi. Deeqaha waxabarashada iyo mashaariicda horumarinta oo loo leexiyo meel gaar ah ama cid gaar la siiyo oo aan caddaalad iyo sinnaan lagu qaybin. Axmed Ciise Cawad (wasiirkii hore ee arrimaha dibadda Soomaaliya) oo "Ha Noolaato" uga waramay arrin xanuun badan oo ku saabsan magacaabista safiir. Waxa uu sheegay in nin aad loo yaqaano oo tuugsade ah, loo magacaabay safiir wadan ka mid ah dalalka Carabta oo muhiim u ahaa dowladda Soomaaliya. Axmed waxa uu sheegay in uu ku talo bixiyey in aan ninkaas loo magacaabin safiir, haddana markii loo adeegsaday awoodda guddoonka baarlamaanka waxa uu soo jeediyey in la geeyo meel aan ceebi ka imanayn, hase yeeshee waa la garab maray taladiisii, oo nin kii waxaa laga dhigay safiir. Maxaa dhacay? Waxaa dhacday in ay isku dhacaan shaqaalihii safaaradda iyo safiirkii, in la shaqaalaysiiyo caruurtii ninka ka dambeeyey magacaabistiisa. Ugu dambeyntii waa la xiray safiirkii oo waxa dhacday ceebtii laga digayey. Tix ka mid ah gabay uu tiriyey Cismaan Yuusuf Keenadiid waxa ay ahayd: " Teersada (fasalka saddexaad) rag aan baran haddii talada loo dhiibay". Cabdi Hoosow oo u duurxulaya labada reer ee ku moogaysta/kaltama madaxweynaha iyo raysul wasaaraha, ayaa talo ku bixiyey, in haddii ay jagooyinkaas isku bedelayaan ay keenaan qof wanaagsan. Waxa uu tusaale u soo qaatay, gabar isla weyn oo nin aysan filayn uu usoo sheeko tegay . Taasoo uu ula jeedo in talada dalka ay isku soo sharaxaan dad aan u qalmin. Musuq maasuqa siyaasadda waxaa ugu weyn

isku milanka baarlamaanka iyo xukuumadda oo ay ka dhalatay in aan lala xisaabtamin hay'adaha fulinta iyo heshiisyada siyaasadeed ee lala galo dowlado dano gaar ah ka leh dalka. Arrintaasi, waa tan keentay in dalku sidii gabal-dayihii, mar bari u jeesto, marna galbeed u jeesto iyo deganaansho la'aanta siyaasada oo ay caddaalad la'aantu sabab u tahay.

Musuqa dhaqaalaha ayaa dalka ugu baahay si xad dhaaf ah, sida kala duwaanshaha hantida qofka iyo dhaqaalaha qofku si sharci ah u soo gala (illicit gain), laaluushka oo ah lacagta loo bixiyo in qofka loo fududeeyo adeeg uu xaq u leeyahay ama mid uusan xaq u lahayn, gaar ahaan mid siyaasadeed, ama mashaariicda loo leexiyo cid gaar ah ama qandaraas shirkad gaar ah la siiyo. Waxaa kale oo waayadan dambe soo if baxday in shirkadaha ganacsigu gaarka ah ay lacago siiyaan masuuliyiinta hay'adaha ay shaqadoodu la xiirto ama masuuliyiintu ay saamiyo ku yeeshaan shirkadaha ganacsiga oo ay halkaas ka dhalato naasnujin. Waxa kale oo jirta in lacagta dowladda si khaldan loo adeegsado (misuse of public money), sida safarrada masuuliyiinta oo ay ku baxaan lacag xad dhaaf ah ama hanti si gaar ah loo leexsado. Lacagaha la dhaqo (money laundering) waa lacago lagu tabcay si sharci daro, ka dibna dib loogu soo wareejiyo nidaamka sharciga ah ee maaliyadeed si loo nadiifiyo, waxaana ka mid ah lacagaha argagixisada loogu shaqeeyo iyo kuwa laga tabco daroogaga. Waxaa jira maanta, masuuliyiin badan oo saami lacageed ku leh qaadka oo laga tabcado hanti maguurto ah, saami shirkad lagu darsado iyo mid cadaan ah. Lacagtaasi miyeysan ka mid noqonayn lacagaha la dhaqo? Waxa kale oo jirta in awoodda talada dalka si khaldan loo adeegsado (abuse of power), iyadoo ay dhacdo in ehelka iyo asxaabta masuulka talada dalka haya ay ka awood bataan masuuliyiin leh awood sharci ah. Musuqa ka jira dalka, geed sare iyo mid hoosaba waa goostay. Nin gabyaa ahaa oo ka hadalaya in dadka wax loo hanbeeyo ayaa yiri: " Boqorow saldano lalansataye, leefinka ha diidin". Hase yeeshee xaaladdu waxa ay maraysaa meeshii uu Cismaan Yuusuf ka yiri: "See lacag u tacabnaa hadday toogadeen noqotay", Xilligii Cabdullahi Yuusuf uu soo rogaal celiyey (2001) Puntland ayaa rag taageerayaashiisa ka mid ahaa, waxa ay u sheegeen in rag qoladii ka soo horjeeday ah ay joogaan meelo nafac leh, waxa ayna doonayeen in laga qaado shaqada. Cabdulaahi oo gartay ujeeddadooda ayaa ku yiri: "Ragga jikada kuma diririn ee madaxnimaan isku haynay" Taasoo oo uu la jeeday inuu meel sare ka laan goosanayo oo uusan hoos ugu noqonayn dadkiisa.

Musuq ugu darani waa kan ku dhacay hab dhaqanka iyo akhlaaqda qofka, waana midka aasaaska u ah musuq maasuq oo dhan, maxaa yeelay waxa lumay qiyamkii iyo akhlaaqdii qofka ku riixaysay in uu masuuliyaddiisa u guto si hufan oo hagaagsan. Dhibaatada musuq maasuqa ee aan ka soo hadalnay ma aha mid ku kooban madaxda dowladda dhexe oo keliya ee waa mid heer walba oo dowladeed ka jirta.

## GUNAANUDKA

Dhibaatada musuq maasuqa ee taabanaysa dhinacyo badan waxaa sabab u ah: (i) dareen la'aanta, daahfurnaan la'aanta iyo hufnaan la'aanta hogaamiyaha, (ii) hoos u dhaca saraynta sharciga, hay'adaha cadaaladda iyo hay'adaha dabagalka oo aan shaqadooda u madax bannaanayn, (iii) kaalinta masuuliyadca bulshada oo maqan, (iv) dhaqanka musuqa oo dalka ku faafay oo noqday wax caadi ah, (v) fahanka bulshada oo hooseeya iyo (vi) isku dheeli tir la'aanta mushahaarka shaqaalaha dowlada iyo heerka nolosha.

Si loogu guuro hanaanka dowlad wanaagga, loona cirib tiro musuq maasuqa baahsan ee gun iyo caar la baxay, waxaa lagama maarmaan ah in la dhaqan geliyo mabaadiida dowlad wanaagga ee ay ugu horreeyaan dareenka masuuliyadda, isla xisaabtanka, daahfurnaanta iyo hufnaanta oo halbeeg u ah hogaanka wanaagsan.

W/Q: Cabdiraxmaan Shiikhdoon

# ISBEDDELKU HEBEL MA AHANE WAA HABDHAQANKA

C/raxman Caynte



Xigashada Sawirka: Villa Somalia

Rubuc qarni ayaa laga joogaa markii jamhuuriyadda saddexaad ee Soomaaliya lagu yagleelay degmada Carta ee dalka Jabuuti. Tan iyo waagaas, himilada ugu weyn ee ay shacabka Soomaaliyeed lahaayeen waxay aheyd hanashada dowlad Soomaaliyeed oo u xaqsoorta, isl markaana soo celin karta qarannimada, qowmiyadnimada iyo qabka Soomaalida. Lix doorasho ayaa dhacday tan iyo waagaas, mid walbana waxay abuureysay yididiilo horleh oo ay shacabku u hammuun qabeen hannaan dowladeed oo la jaanqaadi kara qarniga 21-aad.

25 sano kaddib, wali waxaan baadi goobeynaa dowlad aan ku naalloon karno. Ha yeeshee, baadi goobkaas wuxuu nagu noqday dhaan dabagaalle. Su'aashu waxay tahay: maxaan u xaqiijin la'anahay hadafkaas? Jawaabtu waxay tahay: waxa aan raadineyno, iyo meesha aan ka raadineyno ayaa kaaf iyo kala dheeri ah. Rubuc qarnigaas, waxaan isku beddelnay lix madaxweyne (marka la tiriyo Xasan Shiikh oo laba goor la doortay). Waayeelka, waxgaradka iyo warbaahinta dalku waxay si mala'awaal ah nooga dhaadhiciyeen in xalka Soomaaliya uu ku jiro Faarax oo Feysal lagu beddelo. Lix goor oo aan tubtaas tijaabinnayna, waxaa noo muuqaneysa in jamhuuriyaddii saddexaad ay halis ugu jirto iney burburto. Marka kasta oo doorasha dhacdana, xoogaa qandho-jab ah ayaa la dareemaa, balse dhowr bilood kaddib, waxaa soo ifbaxda inuu cudurkii dhabta ahaa ee kolkii horeba horseeday qaran-jabka Soomaaliya, inuu sii xoogeystay, qandhadii iyo quficiina ay soo laba kacleeyeen.

Haddaba, waxaan ku doodayaa in isbeddelka aan u baahannahay uusan aheyn hebel iyo hebel oo la isku beddelo, balse inuu yahay isbeddel dhammeystiran oo lagu sameeyo habdhaqanka gurracan ee ay ku sifoobeen inta badan haldoorka siyaasadda dalka. Nuxurka habdhaqankaas wuxuu ku qotomaa waxa aan ugu yeero T6:

1. Tuugeysiga xoolaha qaranka

2. Toleysiga xigtada beesha

3. Takrifalka xoogga dowladda

4. Tuugsiga xoolaha shisheeye

5. Tayo xumada la taliyayaasha

6. Tiiro gaabnimada xikmadeed ee madaxda

Habdhaqankaas waa mid gaamuray, wuxuuna noqday mid ay si maalinle ah ugu macaamileen haldoorka dalka. Habdhaqankaas wuxuu noqday mid lagu faano, halkii uu ka ahaan lahaa mid laga faano oo la isku ceebeeyo.

Saameynta ugu xun ee uu reebay habdhaqanka T6 waxay tahay inuu muwaadinka Soomaaliyeed nacsiiyey qiimaha iyo qaayaha muwaannimada. Maadaama uu habdhaqanka T6 ku qotomo caddaalad darro, wuxuu abuuray waxa aan ugu yeero "muwaadinnimo dadban." Tusaale ahaan, ma jiro muwaadin Soomaaliyeed oo maanta xuquuqdiisa aasaasiga ah, sida waxbarashada, caafimaadka, fursadaha shaqada iyo qandaraasyada, si xor iyo xalaal ah kusoo heli kara. Muwaadinku waa inuu xuquuqdiisa u maraa kafiil ama magafe siyaasadeed oo xaqiisa usoo dhiciya, maxaa yeelay hannaanka dowladnimada ku dhisan habdhaqanka T6 wuxuu muwaadinka u arkaa mid dadban. Haddii uu habdhaqanka T6 lahaan lahaa halkudhig, wuxuu noqon lahaa: "dheefta anigaa leh; dhibkana adigaa leh."

## SIDEE LOO BEDDELI KARAA HABDHAQANKA T6?

Caadi ahaan, wax la beddelo waxaa ugu adag habdhaqan soo jireen ah. Xitaa nabiyadii uu Rabbi SWT soo saarayay, farriinta ugu muhiimsan ee ay xambaarsanaayeen waxay aheyd isbeddel dhammeystiran oo lagu sameeyo habdhaqankii qowmkii loo soo saaray.

Muddo 20 sano ka badan ayaan ka shaqeynayay Soomaaliya, anigoo nasiib u yeeshay inaan ka shaqeeyo dhinacyada saxaafadda, cilmibaarista, dowladnimada iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay. Anigoo kaashanaya waaya aragnimadaas baaxadda weyn, waxaan kusoo qancay iney lagama maarmaan tahay in lala halgamo habdhaqanka gurracan ee T6.

Sida ugu habboon ee loola halgami karo habdhaqankaas waa in la qaado saddex tallaabo oo iskaabaya:

1. In aqoonyahanka iyo siyaasiyiinta Soomaaliyeed ee aan ku milmin habdhaqanka T6, iney shacabweynaha aamusan (silent majority) ku abaabulaan, kuna jiheeyaan unkidda dhaqdhaqaaqyo siyaasadeed oo waddani ah, soona bandhigi kara aragti togan oo ku qotonta himilada koobaad ee shacabka Soomaaliyeed, taas oo ah caddaalad siyaasadeed, mid dhaqan-dhaqaale iyo mid bulsho.

2. In dhaqdhaqaaqyadaas ay u midoobaan, isla markaana u diyaar garoobaan halgan siyaasadeed oo tiiro dheer oo yoolkiisu yahay in shacabka Soomaaliyeed laga kor

qaado heeryada T6 iyo inta ku qaraabata. Halgankaas wuxuu u baahan yahay adkeysi iyo abaabul ballaaran, waxaase hubaal ah inuu miradhal noqon doono, maxaa yeelay habdhaqanka T6 waa mid ay ku shaqeystaan fulayaal tiiro gaaban.

3. In, iyadoo la adeegsanayo warbaahinta iyo goobaha kale lagala hadlo bulshada, in la sameeyo wacyigalin ballaaran oo shacabka la marin habaabiyey lagu hoga tusaaleynaayo halka ay sartu ka qurunsan tahay oo ah habdhaqanka T6 iyo magafayaasha ku shaqeysta.

Gunaanadkii, sooyaalka siyaasadda dunida wuxuu na barayaa in haddii isbeddel muuqda (reform) lagu sameyn waayo xaaladda bulsho sideennoo kale bukootay, in tallaabada dabiiciga ah ee xigta ay noqoneyso kacdoon bulsho (revolution). Waxaan rumeysanahay inaan taagannahay isgoyska u dhaxeeya isbeddel dhammeystiran iyo kacdooon bulsho. Waxaan wali heysannaa fursad aan isbeddel ku sameyn karno, haddii kale, waxaa hubaal ah inuu kacdoon bulsho oo aan la xakameyn karin uu qarxi doono.

Soomaalidu waxay tiraahdaa: "balaayo, af la qabto ayay leedahaye, dabo la qabto ma lahan." Isbeddel dhammeystiran waa la xakameyn karaa, waana la jiheyn karaa, balse kacdoon bulsho lama xakameyn karo. Horena waan u soo aragnay sanadihii 1991 iyo 2006; labadaas goorba natiijada kacdoonnadaas waxay noqdeen kuw aan la mahdin.

**W/Q: C/raxman Sh. Yusuf Cali Caynte** waa Wasiirkii hore ee Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Soomaaliya iyo Aasaasihii Machadka Cilmibaarista Heritaga



**Xigashada Sawirka:** Villa Somalia



**Xigashada Sawirka:** BBC Somalia



**Xigashada Sawirka:** Wardoon

# SHEEKO QARAN
## (QAYBTA 2-AAD)

**Halgankii Shiikh Xassan Barsane Nur**

Cabdirashiid Maxamed Cabdi



Xigashada Sawirka: Facebook

# HALGANKII SHIIKH XASSAN BARSANE NUR

Shiikh Xassan Barsane wuxuu ku dhashay gobolka Shabeellada Dhexe dhammaadkii 1953-dii wuxuu ku barbaaray isla deegaankaas, shiikhu wuxuu bartay diinta iyadoo aabihii uu ahaa caalim (Shiikh Nuur) oo laga yaqaan deegaankaas, waxaana lagu daray xer halkaas diinta lagu bari jiray, halkaas oo markii dambe uu ku biiray xarun kale oo ku taallay dagmada Afgooye iyo sidookale magaalada Makkah halkaas oo ku kororsaday Cilmiga diinta kutub fara badanna ku akhristay.


Bilowgii qarnigii 20-aad Shiikh Xassan Barsane waxaa ku dhashay dareen uu ka qaaday gumaystihii Talyaaniga iyo Itoobiya oo ku dhawayd dhanka gobolka Hiiraan, waxaana uu go'aansaday inuu la dagaallamo asagoo ka abaabulay ciidamo dhulka shabeellooyinka, halkaas oo ciidan badan ku diyaarsaday, waxaana uu dagaalkii ugu horreeyay ee Gumar-sheel la galay sanadkii 1905-tii, waxaana xigay dagaallo kale oo badan oo uu la galay Itoobiya iyo Talyaaniga sida dagaalkii Buulburde, dagaalkii Hiilweyne iyo dagaalkii Jilayaale oo dhacay 1924-kii. Halgankii hubaysnaa ee Shiikh Xassan Barsane wuxuu gilgilay gumaystihii Talyaaniga ilaa markii dambe ay dhabar jabin ku sameeyeen oo ay qabteen Shiikh Barsane, halkaas oo aakhirkii ay xabsiga ku dileen 1927-dii.

# HALGANKII SHIIKH BASHIIR SHIIKH YUUSUF

Shiikh Bashiir Shiikh Yuusuf Shiikh Xasan wuxuu ahaa halgamaa Soomaaliyeed oo kamid ahaa dadkii ka dhiidhiyay gumaystihii dalka qabsaday gaar ahaan Ingiriiska, Shiikhu wuxuu ku dhashay dagmada Taleex sanadkii 1905-tii wuxuuna ku barbaaray dagmada Burco ee gobolka Togdheer, Shiikh Bashiir wuxuu ka mid noqday culumada diinta dadka bari jirtay, asagoo xer kulahaa deegaanka Beer oo hoostaga Burco.

Shiikhu wuxuu ahaa dadkii taageeray halgankii Daraawiishta, wuxuuna si wayn uga soo horjeeday gumaystihii Ingiriiska, Shiikh Bashiir wuxuu abaabulay kacdoon looga soo horjeedo siyaasaddii Ingiriiska ee dhabka waxbarashada oo uuu u arkayay in dadka la barayo wax ka fogaynaya diintooda, sidookale Shiikhu wuxuu dhistay ciidan u badan xertiisii diinta kuwaas oo meelo badan ku kacay dawladdii Ingiriiska ee dhulka haysatay sida Burco, Wadamago iyo Ceerigaabo.

Ugu dambaytii, Ingiriiska wuxuu ku talagalay inuu soo afjaro Shiikha iyo xertiisa taas oo dagaal adag la galay, wuxuuna ciidamo ka keensaday Koonfur Afrika halkaas oo ugu dambaytii 1945-tii lagu dilay Shiikh Bashiir Shiikh Yuusuf.



**Xigashada Sawirka:** Facbook



Xigashada Sawirka: Wargayska Dalka

# MASUULIYADDA DADWAYNAHA (2)

Maxamed Nadiif Showkaani

Qormadii hore ayaan si wanaagsan ugu faahfaahinay meesha ay kasoo unkanto masuuliyda si wadar ah u saaran dadwaynaha, waxaana cadaynay inay tahay qayb ka mid ah kala abla-ablaynta awaamirta Ilaahay saaray aadanaha, waxaan si cad u sii tilmaanay in qaybaha waajibka ay ka mid tahay qayb loo fiirinayo marka la qaybinayo waajibka cidda u istaagaysa waajibkaas oo loo kala qaybinayo waajib qofeed iyo mid wadar ama dadwayne.

Waxaan soo sheegnay in marar badan uu waajibka dadwaynuhu isu rogo mid qofeed ayadoo la tixgelinayo duruufaha ku hareeraysan, sidoo kale waxaan si dheer isu dul taagnay tusayaasha sharciga ah ee ku tusinaya inay masuuliyadaan jidho.

Qormadaan ayaan ku faahfaahinaynaa asaasyada ama qaacidooyin sharci ee masuuliyadaan iyo tusaalayaal aan ka bixin doono meelaha ay ka muuqato masuuliyada dadwaynuhu.

## ASAASYADA AMA QAWAACIDA AY KU DHISANTAHAY MASUULIYADA DADWAYNUHU:

Masuuuliyada dadwaynuhu waxay ku dhisantahay ama soo ururinaya arimeheeda kala firdhisan qaacidooyin badan oo fiqi ah laakiin halkan waxaan rabnaa inaan kusoo gaabsano laba asaas ama saldhig oo aad muhiim u ah ayna ka muuqato in qawaacida fiqiga iyo masuuliyada dadwaynuhu ay isugu xiranyihiin:

1. Asaaska ama qaacidaada 1-aad waa tan ah in ay arimaha qaar ku waajibaan dadka ayagoo fangalsan arin kale oo aan looga maarmin si uu u dhamaystirmo kan la fangalsanayay (قاعدة الوجوب بالتبعية), tusaale ahaan waxaan u qaadan karnaa jihaadka oo umada Islaamka waajib lagaga dhigay si loo difaaco diinta Islaamka haddaba si waajibka jihaadka loo guto waxaa waajib fangalsan jihaadka noqonaya wax kasta oo jihaadku u baahanyahay sida hubka iyo warshadaha lagu sameeyo .
2. Asaaska ama qaacidada 2-aad waa saldhiga sheegaya in wixii maslaxad ah la hanto wixii shar ah ama fasaad ahna la dheerayo (جلب المصالح ودرء المفاسد), tusaale ahaan: hadii ay maslaxad tahay in la beero dhulka lana soo boxo dalag kala duwan waxaan waajib noqonaysa wax kasta oo maslaxadaas lagu hanan karo sida barashada cilmiga beeraha iyo wixii la mida .

Asaasyo ama qaacidooyin kale oo badan bay leedahay masuuliyada dadwaynuhu kuwaas oo soo ururinaya darfaha baahsan ee masuuliyadaas.

## LAAMAHA AY LEEDAHAY MASUULIYADA DADWAYNAHA IYO TUSAALAYAASHEEDA:

A. Laanta arimaha diinta si guud: masuuliyadda wadareed ee 1-aad dadka waxay ka saarantahay arimaha diinta iyo difaacideeda iyo barashadeeda iyo barideeda.

1. La dagaalanka kuwa u gafaya diinta Islaamka Hadaan tusaale ka bixino qaybtan waxaa tusaale u noqon kara in lala diriro kuwa amniga umada Muslimka ah dhibaataya sida la dagaalanka nimanka maanta ciidanka Puntland kula diriraya buuraha Caalmiskaad ee gobolka Bari, haddaba in lala diriro dadkaas fool xumayn Islaamka iyo wejigiisa qurxan waxay noqonaysa waajib u yaal dadwaynaha, masuuliyada noocan ahna cida ay u wakiilatay umadu waxay noqonaysaa dowlada markaas ka arimisa haday u kicin waysona cidii awooda bay dusha ka fuulaysaa ilaa ay umada dhan denbi ku noqoto hadii ay ka gaabiyaan, arinkaas marka waa masuuliyad dadwayne ka gaabinteedana denbi lagu mudanayo.
2. Barida Quraanka iyo diinta si guud iyo barashadeedaba: waa tusaale kale oo muujinaya masuuliyada si guud uga saaran dadka barida iyo barashada diinta iyo Quraanka, hada haddii ay si guud uga wada haraan dadku waxay noqonaysaa in denbigu wada gaaro .

3. Dacwadda iyo faridda wanaaga iyo ka reebidda xumaanta: waa qayb kale oo ka mida masuuliyad wadareeda u taal umada waxaana laga rabaa inay u kacaan ugu yeerida dadyowga kale diinta ilaahay sidoo kale inay is faraan dhexdooda wanaaga iskana reebaan xumaanta .

B. Laanta labaad waa qaybta la xiriidha cibaadada: si guud dadku waxay u garanayaan in arimaba badan oo la xiriira cibaadada ay tahay masuuliyad dadwayne inagoo aan kale qaadin ama sii faahfaahina waxaan tusaale u qaadan karnaa kuwan:

1. Salaada wadar ahaan loo tukado ama salaada jamaacada, waxaa ku jira aragtiyo kala duwan inay tahay salaada jamaacadu mid qofeed ama sune la adkeeye ama mid wadareed oo hadii qaybi samayso dadka inta kale ka dhacaysa laakiin waxaa muhiima in mid ka mid aragtiyadaas ay dhahayso waa masuuliyada wadareed ama guud in la oogo salaada jamaacada .
2. Salaada janaasada iyo kafmidda maydka iyo aasidiisa waa cibaadooyin Alle inoo diray oo si guud inoo saaran .

C. Laanta mucaamalaadka iyo nolosha guud ahaan: qaybtaan ama laantaan waxaa hoos yimaada tusaalayaal badan oo tira beel ah cadaynayana in Islaamku wax kasta oo maslaxada guud taabanaya uu u sameeyey qaab lagusoo hanto ama lagu keensan karo, qaybtaan waxaan tusaale uga dhigi karnaa;

1. Dhaqaalaha, kala iibsashada iyo kala gadashada waa qaybo laantaas hoos imanaya oo u si guud ugu yaal dadwaynaha, waxaa kasii mid noqon kara sidoo kale barshada arimahaas.
2. Arimaha bulshada qaybtaan waxaan tusaale uga dhigi karnaa: qaadida salaanta marka lagu salaamo oo si guud ugu taal dadka la salaamay inay qaadaan, sidoo kale waxaa ka mida heshiisiinta dadka isku dhacsan ama is haya iyo dawaynta iyo tolida dharka iyo adeegyada la mida ee bulshada si guud noloshooda taabanaya .
3. Arimaha aqoonta iyo ogaalka guud; waxaa si guud dadka u saaran inay soo saaraan dadkii fatwada diinta bixin lahaa ama u kala garsoori lahaa dadka sidoo kale dhinac kasta oo aqoon ahaan loo baahanyahay waa inay dadku soo saaraan dadkii ka awdin lahaa dhinacaas, taasina waa masuuliyad wadareed u wada taal gaar ahaan dadkii ay u dirsadeena adeega guudna gooni u koraysa ayna tahay in lagula xisaabtamo diin ahaan iyo dowlad ahaanba .
4. Arimaha farsamada iyo warshadaynta; sida ka muuqata cinwaanka qaybtaan waxaan masuuliyad wadareed ah in la helo wixii farsamo loo baahdo ama warshadayn maxaa yeelay waxay taaban maslaxad guud sidaan horay ku xusnayna maslaxada guud wixii ay ku jidho waa in la hantaa ama la keensado meel walba ha jidhee.

D. Si guud nolosha casriga ah waxay u waajibanaysaa waxyaaba badan sida:

1. Sida samaynta xarumo, meelo ama kanaalo lagu dhiso wacyi dadka looguna sheego xuquuqdooda diin ahaan iyo dowlad ahaanba, sidoo kale loogu qeexo masuuliyada naftooda, mustaqbalka umadooda iyo dowlad dhisidaba ka saaran.
2. Sidoo kale waxaa lama dhaafaaan ah farsamooyinka madaniga iyo warshadaynta iyo wax soo saarka si guud waa masuuliyad saaran dadwaynaha aana laga aqbalayn inayn ka gaabiyaan, haddii ay dhacdo cid ay u wakiisheen inay arimahaas qabato ay ka gaabisona ay la xisaabtamaan ama ay xilkaba ku waydo.
3. Waxaa ka mid ah dhisida laamiyada, buundooyinka, garoomada, dekedaha iyo wax kasta oo umada nolosheedu baahi u qabto.

Si guud masuuliyada dadwaynuhu waa mid taabanaysa dhamaan qaybaha nolosha ee aysan fududayn qof keli ah inuu u koco ama uusan daboolin karo sida barashada xirfadaha kala duwan ee aan qof keli ah uusan dadka ka daboolin karin, markaan si guud bay dadwaynaha ugu taalaa daboolida baahiyahaas hadayan daboolina waxay ku mudanayaan cara alle, denbi iyo ciqaab.

**W/Q:** Maxamed Nadiif Showkaani



Xigashada Sawirka: Hawlgalka Hilaac

# HIRGELINTA XASILLOONI WAARTA EE DEEGAANADA LAGA SIFEEYAY DAACISH

Mustafe Cismaan Faarax

Ciidamada Puntland ayaa sanadkan 2025-ka bilowgiisii guluf culus oo muddo la diyaarinayay ku qaaday maleeshiyada Daacish oo qiyaastii toban sanno saldhigyo ku lahaa buuraha Caalmiskaat ee gobolka Bari. Ciidamada ayaa dagaalo kala duwan ay la galeen Daacish ku jabiyay, taasoo u suurtagelisay in ay gacanta ku dhigaan deegaano istaraatiiji ah oo muddo gacanta ugu jiray maleeshiyada.

Inkastoo ay ciidamadu guulweyn  ka gaareen Daacish ayna ka xoreeyeen deegaano badan, bilihii u dambeeyay, ma uusan dhicin dagaal toos ah marka laga reebo iska horimaadyo yaryar, taasoo muujinaysa tabar darada kooxda, oo hadda intii hartay ay ku jirtaa dhuumaalaysi, iyadoona dowladda sheegtay in wajiga afraad ee howlgalka Caalmiskaat uu soo gabogaboobay.

Taliyaha ciidaanka Daraawiishta Puntland Janaraal Aadan Cabdi Xaashi ayaa horey u sheegay in qorshaha dagaalkan ay ugu talogaleen uu yahay qiyaastii sanad iyo bar in uu socdo si loo soo afjaro kooxda, balse marka la fiirsho guulaha ay ciidamadu gaareen ayaa muujinaya in intii qorshuhu ahaa ka yar ay qaadan karto.

Haddaba, si loo gaaro xal waara oo lagaga hortago in kooxda Daacish ay dib ugu soo laabtaan deegaanada laga xoreeyay, waxaa lagama maarmaan ah in aan lagu koobnaan howlgalada milatari oo keliya, balse la xoojiyo wax ka qabashada caqabadaha sababay in kooxdan ay deegaanadaas ay saldhigyo ka samaysato, iyadoo la adeegsanayo hab xal waara ah (durable solution) oo isugu dhafan dhinacyada amniga, maamulka, horumarinta dhaqaalaha, iyo baahinta adeegyada bulshada.

Marka la eego deegaannadii laga saaray Daacish tusaale ahaan Tuurmasaale, Dhaadaar, Dhasaan, waxaa xal waara u noqon kara in laga hirgeliyo adeegyada asaasiga ah sida xarumo caafimaad iyo kuwo waxbarasho, iyo sidoo kale in laga hirgeliyo hay'adaha dowlada qeybtood sida saldhigyo booliis, si ay dadka deegaanku u dareemaan dowladnimada.

Dhanka kale, dhismaha kaabayaal dhaqaale sida waddooyinka gaar ahaan wadada isku xirta Ballidhidin, Tuurmasaale illaa Dhasaan waa tiir kale oo muhiim ah oo kobcinaya isku socodka dadka deegaanka, ganacsiga iyo adeegyada bulshada.

Waxa kale oo  xal waara noqon kara in dib u dejin loo sameeyo dadka reer guuraaga ah ee ku barakacay howlgalada ciidamada iyo duqeymaha ka dhanka ah kooxda Daacish, iyadoo loo dhisayo ceelal biyoodyo iyo adeegyo la jaanqaadi kara nolol maalmeedkooda.

Dib u dejintaas waa in lagu lifaaqaa xalal siyaasadeed oo ballaaran sida ballaarinta maamulka, maamul-wanaagga, iyo awood qeybsi ku salaysan cadaalad oo ku dhisan kalsooni iyo matalaad dhab ah oo ay helaan dhammaan dad deegaanka, oo muujiyay cabashooyin la xiriira in la iska indhatiray baahiyahooda maamul iyo dowladnimo. Dadka deegaanka ayaa qaba tabashooyin ku saabsan sida ay u dareemayaan in dowladdu ay diiradda saarto keliya deegaannada laamiga weyn ku teedsan, halka deegaannada wadada laamiga ka baxsan la dayacay.

Ugu dambeyn, waxaa muhiim ah in dowladda Puntland ay ka faa'iidaysato guulaha ay ka gaartay howlgalka ka dhanka ah Daacish si ay u dhisto xasilooni waarta oo aan dib loogu noqon marxaladihii hore. Taasina waxay u baahan tahay qorshe ballaaran oo isugu jira xalal degdeg ah iyo kuwa waqti-dheer, iyadoo lagu saleynayo baahinta nidaamka dawladnimo, fulinta mashaariic horumarineed, matalaad siyaasadeed iyo is dhexgal bulsho. Xalku ma noqon karo keliya in lagu guuleysto dagaalka milatari, balse waa in lagu guuleysto oo la hanto qalbiyada dadka si mar dambe deegaanadoodu aysan u noqon meel kooxo argagixiso ah hoy u noqda.

**W/Q:** Mustafe Cismaan Faarax

FAALO TIFAFTIREED

# TAHRIIBKU DHALLINYARADA WAA SOCDAA, DOWLADDA PUNTLAND XAL UMA HAYSO



Xigashada Sawirka: Facebook

Sida lagu qeexay, tahriibku ama socdaalku waa dhaqaaqa dadku uga tagayaan meel ay horay u degganaayeen kuna aadayaan meel kale, iyagoo leh ujeeddo cad oo ah inay beddelaan goobta ay kunoolaayeen.

Maalin kasta, dhallinyaro reer Puntland ah ayaa isaga cararaya deegaankooda, iyagoo rajaynaya mustaqbal ka wanaagsan midka ay ku arkaan gudaha dalka. Shaqo la'aan joogto ah, dakhli xumo, iyo fursad la'aan nololeed ayaa noqday sababaha ugu waaweyn ee ku riixaya tahriibka baahsan ee maalinba maalinta ka dambaysa sii kordhaya.

Bilihii u dambeeyay, waxaa gudaha Puntland ka bilaabmay qulqulka dhallinyarada ka tahriibaya deegaankooda iyaga oo doonaya nolol iyo fursad ka fiican in ay ka helaan wadamada Qaarada Yurub iyagoo u bareera safarka halista badan ee Saxraha kulul kadibna isku daya in ay maraan badda halista badan ee Mediterranean iyagoo raacaya doonyo liita.

Sida ay muujinayaan daraasado badan oo sanadihii u dambeeyay laga sameeyay Soomaaliya oo ay ku jiraan deegaanada Puntland, tusaale daraasad uu diyaariyay Machadka Heritage ayaa muujinaysa in 70 boqolkiiba dadka la waraystay ay sheegeen in la'aanta fursadaha shaqo iyo xaalad dhaqaale oo liidata oo qoysaska heysata ay tahay sababta ugu weyn oo ay dhallinyarada Puntland uga tahriibayaan deegaanadooda, marka la barbardhigo deegaanada kale ee Soomaaliya gaar ahaan koonfurta oo ay dhallinyaradu sheegeen in xaalado amni darteed ay uga tahriibaan.

Ku dhawaad 30 dhallinyaro ah oo intooda badan ka tagay Puntland ayaa ku geeriyootay labadii bilood ee u dambeeyay badda Mediterranean ee u dhaxaysa Algeria iyo Spain, halka boqolaal kale ay weli ku suganyihiin dalalka Algeria iyo Libya iyagoo doonaya in ka gudbaan biyaha hallista badan.

## WALAACA BULSHO EE KU SAABSAN TAHRIIBTA DHALLINYARADA

Bilihii u dambeeyay, qeybaha kala duwan ee bulshada Puntland ayaa walaac ka muujinayay qulqulka tabriibka dhallinyarada ee deegaanada Puntland. Dadka arrintaas ka hadlay ayaa waxaa kamid ah isimada, aqoonyahanada, siyaasiyiinta iyo culimada.

Bishii May bartankeedii, ururka jaamacadaha Puntland ee (APU) ayaa dood cilmiyeed qabtay looga hadlayay dhibbaatada tahriibka ee dhallinyarada. Dhanka isimada, Suldaan Siciid Maxamed Garaase ayaa ka hadlay tahriibka dhallinyarada. Sidoo kale, Shiikh Maxamuud Xaaji Yuusuf, oo kamid ah culimada ugu waaweyn Puntland ayaa isna ka hadlay tahriibka dhallinyarada, iyagoo dhammaantood isku raacay in fursad la'aanta shaqada ay tahay sababta ugu weyn ee keentay tahriibka.

Sidoo kale, bulshada Puntland ayaa bilihii u dambeeyay baraha bulshada iyo goobaha la isugu yimaado si weyn uga hadlayay qulqulka cusub ee dhallinyarada Puntland ka tahriibaysa.

## JAWAABTA DOWLADDA PUNTLAND EE TABRIIBTA DHALLINYARADA

Wasiirka warfaafinta Puntland Maxamuud Caydiid Dirir ayaa marar kala duwan tahriibta ka hadlay, isagoo mar sheegay in dhallinyarada tahriibaya ay sabab u tahay in ay haystaan dhaqaale, markale waxa uu ku eedeeyay waalidiinta in in ay caruurtooda iyagu tahriibinayaan.

Marka laga tago wasiirka warfaafinta oo looga bartay in uu eedaha dowladda ka difaaco, wasaaradda shaqada iyo shaqaalaha Puntland oo masuuliyada shaqo abuurka iyada waajibaadkeeda yahay kama aysan hadlin ilaa iyo hadda dhallinyarada tahriibaysa, maadaama sababta ugu weyn oo ay dalkooda uga tagayaan ay tahay fursad shaqo la'aanta ka jirta Puntland.

Sidoo kale, ilaa iyo hadda ma jirto balanqaadyo ku aadan barnaamiyo ay dowladdu soo bandhigtay si wax looga qabto tahriibta dhallinyarada.

Madaxweynaha Puntland Siciid Cabdullaahi Deni oo 15-ka June 2025 khubad ka jeedinayay kalfadhiga baarlamaanka Puntland ayaa si cad u qirtay in mustaqbalkii dhallinyarada ay dileen, rajadiina ay ka baabi'iyeen, ayna xaq u leeyihiin in ay naftooda halis geliyaan si ay badda u maraan iyaga oo doonaya mustaqbal wanaagsan. Inkastoo madaxweynuhu qirtay arrintaas, haddana ma uusan sheegin wax xal ah.

**Website**: https://maragnews.com/
**Email**: editor@maragnews.com

MAJALADDA MARAG